DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

# PUNTLAND STATE OF SOMALIA
# OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL



| | | | |
|---|---|---|---|
| SANADKA 23AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 15/08/23 | Lam. 09 |



## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZETTE

## الجريدة الرسمية

## Sharciga Maamulka Maaliyada Guud ee Dowladda Puntland

| TUSMADA | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Maamulka Maaliyada Guud ee Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

50

**Sharci Lr. 09 ee 15-ka Agoosto 2023, kuna saabsan Sharciga Maamulka Maaliyada Guud ee Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/51/2023, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2023.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo Sharciga Maamulka Maaliyada Guud ee Hay'adaha Dowladda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Maamulka Maaliyada Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

ولاية بونتلاند الصومالية مكتب الرئيس
Office of the President Puntland State of Somalia

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/51/2023** **Garoowe, Khamiis** **Taariikh: - 10/08/2023**

**Ku: - Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:-**Ansixinta Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud Ee Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY: -** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobadiisa 64-aad

**MARKUU ARKAY: -** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/106/2023 ee July 3, 2022, kuna saabsan Hindise-Xeereedka Maamulka Maaliyadda Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud Ee Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 52-aad, Fadhigiisii 18-aad ee 08.08.2023 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud Ee Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**35**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**35**) Mudane, Diidmo iyo aamustoona majirin.

**WUXUU GUDDOOMIYEY: -**

**Ansixinta Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud Ee Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

## GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

# XEERKA MAAMULKA MAALIYADA GUUD

---

**Agoosto, 2023**

**GAROOWE, PUNTLAND, SOOMAALIYA**

## TUSMO


Bogga

CUTUBKA 1-AAD ........ 8

QODOBO GUUD ........ 8

Qodobka 1-aad ........ 8

Erey Bixin ........ 8

Qodobka 2-aad ........ 12

Magaca Xeerka ........ 12

Qodobka 3-aad ........ 12

Ujeedada Xeerka ........ 12

Qodobka 4-aad ........ 12

Baaxadda Xeerka ........ 12

Qodobka 5-aad ........ 12

Mabaadi'da Guud ee Maaliyadda ........ 12

Qodobka 6-aad ........ 13

Lacagta Dawladda/ iyo Wadarta Khasnadda Dawladda ........ 13

Qodobka 7-aad ........ 14

Cashuur Dhaaf ........ 14

Qodobka 8-aad ........ 15

Wada shaqaynta Dawladda iyo Dawladaha hoose ........ 15

CUTUBKA 2AA-D ........ 15

Awoodaha & Mas'uuliyadda Miisaaniyadda & Maareynta Maaliyadda Guud DPL ........ 15

Qodobka 9-aad ........ 15

Xilka iyo Waajibaadka Golaha Wakiiladda ........ 15


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA FU... STATE GENERAL SOLICITO...

Qodobka 10-aad........................................................................................................... 16
Xilalka iyo Waajibaadka Wasiirka ........................................................................................ 16
Qodobka 11-aad........................................................................................................... 18
Xisaabiyaha Guud........................................................................................................ 18
Qodobka 12-aad........................................................................................................... 19
Hanti Dhowraha Guud .................................................................................................. 19
Qodobka 13-aad........................................................................................................... 19
Saraakiisha Idman........................................................................................................ 19
QEYBTA 3AAD.............................................................................................................. 21
DIYAARINTA IYO ANSIXINTA MIISAANIYADA .................................................................. 21
Qodobka 14aad............................................................................................................ 21
Qorshaha Siyaasadda Miisaaniyadda............................................................................... 21
Qodobka 15aad............................................................................................................ 21
Qaab-Dhismeedka Miisaaniyadda .................................................................................. 21
Qodobka 16-aad........................................................................................................... 22
Aasaaska Guud iyo Guud-marka Miisaaniyada. ................................................................ 22
Qodobka 17-aad........................................................................................................... 23
Dakhliga Dheeriga ah ................................................................................................... 23
Qodobka 18-aad........................................................................................................... 23
Jadwalka iyo Xilliga Diyaarinta Miisaaniyadda Sannadlaha. ............................................... 23
Qodobka19-aad............................................................................................................ 24
Dukumintiyada iyo Tusmooyinka soo jeedinta Miisaaniyadda............................................. 24
Qodobka 20aad............................................................................................................ 25
Qoondeynta Lama Filaanka Miisaaniyadda ...................................................................... 25
Qodobka 21aad............................................................................................................ 25
La-socodka Miisaaniyadda ee dadwaynaha........................................................................ 25

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 22aad ........................................................................................................ 25

Ansixinta Miisaaniyada ........................................................................................ 25

Qodobka 23aad ........................................................................................................ 26

Wax ka bedelka qoondada Miisaaniyadda ee Golaha Wakiillada ..................................... 26

Qodobka 24aad ........................................................................................................ 26

Isticmaalka miisaniyadda ku-meelgaarka ah ............................................................... 26

Qodobka 25aad ........................................................................................................ 26

Kabidda iyo ku Noqoshada Miisaaniyadda ee Sannadka Dhexdiisa ................................ 26

Qodobka 26aad ........................................................................................................ 27

Saamaynta Dhaqaale ee Dhaqangelinta Hindisaha xeerarka ........................................ 27

MADAXA 4AAD: ...................................................................................................... 27

DHAQAN GELINTA MIISAANIYADDA ............................................................................ 27

Qodobka 27aad ........................................................................................................ 27

Masuuliyadda Dhaqangelinta Miisaaniyadda .............................................................. 27

Qodobka 28-aad ...................................................................................................... 28

Heerarka Fulinta Miisaaniyadda ............................................................................... 28

Qodobka 29-aad ...................................................................................................... 28

Xeerarka Guud ee la Xiriira Fulinta Miisaaniyadda ..................................................... 28

Qodobka 30-aad ...................................................................................................... 29

Dakhliga Sannadka iyo Qorshaha kharash Bixinta ........................................................ 29

Qodobka 31-aad ...................................................................................................... 30

Heshiisyada iyo Iibka ............................................................................................... 30

Qodobka 32-aad ...................................................................................................... 30

Hubinta Balan Qaadyadda ........................................................................................ 30

Qodobka 33-aad ...................................................................................................... 31

Ogglaansho Kharash Bixin ........................................................................................ 31

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 34-aad ........................................................................................................ 31

Kala wareejinta Qondooyinka Miisaaniyadda Dawladda ........................................ 31

Qodobka 35aad ........................................................................................................ 32

Dhicitaanka Qoondooyinka Dabayaaqada Sannad Maaliyadeedka ............................ 32

MADAXA 5AAD ........................................................................................................ 32

DEYMAHA, DAMMAANAD QAADKA DAWLADDA IYO MAAMULKA DEEQAHA ................. 32

Qodobka 36-aad ........................................................................................................ 32

Deymaha Dawladda ........................................................................................................ 32

Qodobka 37aad ........................................................................................................ 33

Dammaanadaha Xukuumadda ........................................................................................ 33

Qodobka 38-aad ........................................................................................................ 34

Haykalka Maareynta Deeqaha iyo Waajibaadka Hay'adaha aan Dawliga ahayn ............ 34

Qodobka 39-aad ........................................................................................................ 35

Warbixinnada Amaahda Wakaaladaha iyo Hay'adaha Dawladda ................................ 35

Qodobka 40-aad ........................................................................................................ 36

Diiwaangelinta iyo Warbixinta Daymaha Dawladda .................................................. 36

MADAXA 6-AAD ........................................................................................................ 36

MAAMULKA LACAGTA NAQADIGA AH IYO HABEYNTA BANKIYADA ............................ 36

Qodobka 41-aad ........................................................................................................ 36

Maamulka Lacagta Naqdiga ah ........................................................................................ 36

Qodobka 42-aad ........................................................................................................ 37

Habeynta Bankiyada ........................................................................................................ 37

MADAXA 7-AAD ........................................................................................................ 38

XISAABAADKA IYO WARBIXINADA ........................................................................................ 38

Qodobka 43-aad ........................................................................................................ 38

Xisaabaadka ........................................................................................................ 38

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 44-aad ........ 39

Warbixinada Xisaabaadka ........ 39

Qodobka 45-aad ........ 40

Warbixinada Sannadka Gudihiisa ........ 40

Qodobka 46-aad ........ 40

Warbixin Maaliyadeed ee Sannadle iyo Baadhitaanka Dibedda ........ 40

MADAXA 8-AAD ........ 42

Hantidhawrka Gudaha ........ 42

Qodobka 47-aad ........ 42

Hantidhawrka Gudaha ........ 42

MADAXA 9-AAD ........ 43

WAKAALADAHA / SHARIKADAHA EE DAWLADDA IYO ........ 43

SANDUUKHYADA GAARKA AH ........ 43

Qodobka 48-aad ........ 43

Maaraynta Maamulka Maaliyadda Guud ........ 43

Qodobka 49-aad ........ 44

Soo Gudbinta Dhamaystirka Miisaaniyadda ee Wakaaladaha & Sanduukhyada Gaarka ah........ 44

Qodobka 50-aad Warbixinta Sannadka Gudihiisa iyo Warbixin Maaliyaddedka ee

Wakaaladaha/Sharikadaha Dawladda ........ 44

Qodobka 51aad ........ 45

Lacagta Dheeriga ku ah Wakaaladaha iyo Sharikadaha Dawladda ........ 45

MADAXA 10-AAD ........ 45

QODOBO GAAR U AH WAKAALADAHA / SHARIKADAHA EE DAWLADDA ........ 45

Qodobka 52-aad ........ 45

Xadka iyo Awoodaha ........ 45

Qodobka 53-aad ........ 46

Qorshaha Maaliyadeed ee Wakaaladaha iyo Shirkadaha ..... 46
Dawladdu Leedahay ..... 46
Qodobka 54-aad..... 46
Warbixinada Sannadka Dhexdiisa ah iyo Warbixinnada Sannadlaha ah ee Wakaaladaha iyo Shirkadaha Dawladdu Leedahay..... 46
Qodobka 55-aad..... 46
Siyaasadda Faa'iida Qaybsiga ..... 46
MADAXA 11-AAD ..... 47
HANTIDA DANTA GUUD..... 47
Qodobka 56-aad..... 47
Danta Guud ..... 47
Qodobka 57-aad..... 47
Hantida Kale ee Dawladda ..... 47
MADAXA 12-AAD ..... 48
Xayiraadaha ..... 48
Qodobka 58-aad..... 48
Masuuliyad-Maaliyadeedka Shakhsiga ah ee Sarkaalka Idman ..... 48
Qodobka 59-aad..... 48
Soo-celinta Lacagta kharash bixin si Khalad ah ku Baxday..... 48
Qodobka 60-aad..... 48
Dembiyada iyo Ciqaabaadka ..... 48
Qodobka 61-aad..... 49
Cadeymaha Diwaangelinta Danabaysan ..... 49
MADAXA 13-AAD ..... 50
MAAMULKA DAKHLIGA KHEYRAADKA DABIICIGA..... 50
Qodobka 62-aad..... 50

Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ........ 50

Qodobka 63-aad ........ 50

Ururinta iyo Dhigista Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ........ 50

Qodobka 64-aad ........ 50

Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ........ 50

Qodobka 65-aad ........ 51

Warbixinnada Xisaabta Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ........ 51

Qodobka 66-aad ........ 52

Keydinta Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ........ 52

Qodobka 67-aad ........ 53

Burin ........ 53

Qodobka 68-aad ........ 53

Dhaqangal ........ 53

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## CUTUBKA 1-AAD

## QODOBO GUUD

### Qodobka 1-aad

### Erey Bixin

Haddii aan si kale loogu qeexin xeer kale, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:-

| No | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1 | Hay'adda Dawladda | Waxaa ku jira Wasaarad kasta, Hay'ad madaxbannaan, Waax, Xafiis, Guddi, Komishan, Hay'ad awood gaar ah leh, Gobollo, Degmooyin, tuulooyin, hay'ad ama waax hoos timaadda Dawladda aan ka ahayn Bankiga Dawladda, mas'uuliyadiisa iyo shaqooyinka uu xeerkan lagu qeexay iyo xeerka lagu aasaasay Bankiga. |
| 2 | Hanti-Dhawraha Guud | Waxaa loola jeedaa sarkaalka u xilsaaran ama leh Awoodda Xafiiska Hanti-Dhawrka Guud ee lagu dhisay Xeerka Xafiiska Madaxa Banaan ee Hanti-Dhawrka Guud, ee xeer Lr. 15 ee 2000. |
| 3 | Hay'ad madax-bannaan | Waa Hay'ad is maamusha oo ay Dawladdu aasaastay, leh mas'uuliyad go'aan qaadasho, diyaarsan karta qorshe fog, gaarna u ah wixii ka yimaadda go'aamada ay qaadato lehna faragelin la'aan ama kooban ee kaga timaadda Dawladda. |
| 4 | Qaybaha guud ee kharashka | Madaxa sare ee qaybaha kharashka la isugu geeyo sida ku xusan qodobka 8-aad ee Xeerkan. |
| 5 | Madaxyada Xisaabaadka | Waxaa loola jeedaa qaabdhiska tiro xisaabeed qaabeysan oo loo adeegsado in lagu kala saaro laguna diiwaangeliyo dhaqdhaqaaqa miisaaniyadda dakhliga iyo kharashka, sidoo kalena Hantida Dawladda iyo deymaha. |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

| | | |
|---|---|---|
| 6 | Ballanqaadka | Waxaa loola jeedaa waajib sharciyeed oo leh fullin qasab ah ee lacag bixin dhinac kale. |
| 7 | Xisaabta lagu ururiyo dakhliga | Waa isu-geynta guud ee dakhliga soo gala Dawladda Puntland waxaana loo isticmaalaa qoondada iyo bixitaanka kharashaadka Dawladda. |
| 8 | Ku-Talagalka Xaaladaha Degdegga | Waxaa loola jeedaa macnaha ku xusan Qodobka 19 (1). |
| 9 | Sannad Maaliyadeed | Waxaa loola jeedaa muddada 12-ka bilood oo isku xigta oo qiyaasta Miisaaniyadda iyo hawlgalladeeda la diiwaangeliyey, lagu talagalay lagana warbixiyey, wuxuuna ka bilaabanayaa Sannad Maaliyeedka maalinta 1da Janaayo, wuxuuna ku egyahay 31ka Diseembar ee Sannadka. |
| 10 | Dawladda | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed oo awood u lehDawladaha Hoose, Wasaaradaha iyo waaxyaha hoos yimaadda iyo Hay'adaha kale ee madaxa bannaan. |
| 11 | Amaahsi | Waxaa ku jira deymaha, dammaanadaha deynta iyo wax kasta oo kale ee Qaababka deynta iyo fududeeyaha amaahda. |
| 12 | Hantida Dawladda | Waxaa loola jeedaa Hantida guurtada iyo maguurtada iyo Hantida u gaarka ah Hay'adaha Dawladeed |
| 13 | Madaxa Hay'adda | Wuxuu u taagan yahay mas'uulka u sarreeya ee Hay'addaha Dawladda, Wasiirka marka ay tahay Wasaarad. |
| 14 | Hagayaasha | Waxaa soo galaya shuruucda, buugta lagu qoro habraacyada kala duwan, amarada Wasiir iyo ogaysiin. |
| 15 | Wasiir Hay'adaha ay Khusayso | Waxaa loola jeedaa wasiirrada Xukuumadda ee Hay'adaha si gaar ah looga hadlayo. |

| | | |
|---|---|---|
| 16 | Wasiir | Waxaa loola Jeedaa Wasiirka Maaliyadda ee Dawladda Puntland ee Soomaaliya. |
| 17 | Wasaaradda | Waxaa loola jeedaa wasaarad kasta oo ka mid ah Dawladda Puntland. |
| 18 | Miisaaniyadda Dawladda | Waxaa ku jira xeerka Kutalagalka-Qoondada ama xeerka Kabista Kutalagalka-Qoondaha Dheeriga ah oo uu ku ansixiyey Golaha Wakiillada Puntland Sannad maaliyadeedka. |
| 19 | Ururada aan Dawliga Ahayn | Waxaa loola jeedaa koox ka mid ah dadka rayidka ah oo iskood isku abaabula iyagoon faa'ido raadinayn, hase yeeshee ka shaqeeya Arrimaha Bulshadda, Horumarinta, Samafalka iyo Cilmi-baarista. |
| 20 | Soo Jeedinta Miisaaniyadda | Waxaa loola jeedaa qabyo-qoraalka Miisaaniyadda Dawladda ee uu Wasiirku u gudbiyey Golaha Wakiillada. |
| 21 | Maamulka Maaliyadda ee Dawladda | Waxaa loola jeedaa nidaam maamul, xeer, iyo habraac hubin aya sida ugu wanaagsan, dhaqaalaysan ee loo isticmaalayo dhaqaalaha Dawladda iyadoo la raacayo nidaamka loo dejiyey. |
| 22 | Lacagta Dawladda | Waxaa loola jeedaa dhammaan lacagaha Khasnadda ama ay maamulaan Hay'adaha Dawladda ama Shakhsiyaad ka wakiil ah. |
| 23 | Khayraadka Dadka | Waxaa loola jeedaa dakhliga ku soo gala tabarucaad. |
| 24 | Dib u qoondayn | Waxaa loola jeedaa wareejinno kharash oo loo kala sameeyo Hay'ado Dawladeed ama madaxyo kala duwan ee miisaaniyadda sannadka. |
| 25 | Wasiir ka shaqeeya meel gaar ah | Waxaa loola jeedaa Wasiir mas'uul looga dhigay shaqooyin gaar ee ay fuliso Wakaalad Dawladdu leedahay. |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

| | | |
|---|---|---|
| 26 | Xeerka Kabista Kutalagalka-Qoondaha Dheeriga ah | Waxaa loola Jeedaa xeer, ujeedadiisu tahay kabista kutalagal-qoondo horey loogu dammaanad qaaday xeerka Kutalagalka-Qoondada. |
| 27 | Meelaha lagu bixin karo kharashka | Waa kharash lagu cayimay miisaaniyadda dawladda. |
| 28 | Hay'adaha wax kharash garayn kara | Waxaa loola jeedaa Hay'adaha Dawladda, kuwa madaxa bannaan ee qabta shaqooyin dawladeed, hoos yimaadda Hay'ad dawladeed ama toos u hoostaga Wasaaradda Maaliyadda kuwaasoo leh awood ay ku fuliyaan miisaaniyadda loo geliyay Hay'addooda. |
| 29 | Shirkadaha Dawladdu Leedahay | Waxaa loola jeedaa shirkad ganacsi oo sharci ku dhisan, saamiga ugu badan hantidana ay dawladdu leedahay, iib geysa wax soo-saarkeeda ama adeeg ay qabato, kharashkeedana ku bixisa dakhliga ay ka hesho ganacsigaas. Lahaanshaha saamiga ugu badan ee shirkadda waxaa soo hoos gelaya awoodaha ah in ay maamusho siyaasadaha dhaqaale iyo howlgelin si ay uga hesho faa'iido badan.<br>b. In ay magacawdo ama shaqada ka saarto dhammaan ama ugu badnaan madaxda sare ee shirkadda.<br>t. In ay magacowdo ama shaqada ka eriso maareeyaha guud ee shirkadda<br>j. In ay yeelato codadka ugu badan marka la codaynayo sannadkii<br>x. In ay kaantaroosho codadka ugu badan ee xilliga doorashada |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND · STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 2-aad

## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud.

## Qodobka 3-aad

## Ujeedada Xeerka

Ujeeddada Xeerkani waa:

1. Maamulka dhammaan arrimaha la xiriira Maareynta Maaliyadda Guud ee Dawladda Puntland.
2. Dejinta mabaadi'da asaasiga iyo habraacyada diyaarinta, ansixinta, fulinta Miisaaniyadda, xisaab-xirrada iyo arrimaha la xiriira.
3. Kormeerka gudaha, warbixinnada iyo baarisaha dakhliga iyo kharashka, raasumaalka iyo deymaha.
4. Maareynta deynta guud iyo damaanadaha Xukuumadda.

## Qodobka 4-aad

## Baaxadda Xeerka

1 Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan Hay'adaha Dawladda Puntland

2 Xeerkan waxaa lagu maareynayaa dhammaan Hantida guurta iyo maguurtada ah ee ay Dawladdu mas'uulka ka tahay iyo lacagaha Dawladda.

## Qodobka 5-aad

## Mabaadi'da Guud ee Maaliyadda

Maareynta Maaliyadda Dawladda Puntland ee Soomaaliya oo ay ka mid tahay diyaarinta iyo fulinta Miisaaniyadda Qaranka waxaa hagaya Mabaadi'da soo socota:-

**b.** Isla-xisaabtan:- dhammaan hay'adaha xubnaha ka ah Laanta Fulinta, waxaa la xisaabtamaya Golaha Wakiillada oo kala xisaabtami doona sida ay u gutaan xilkooda si waafaqsan hab dhaqanka ku xusan Xeerka Maareynta Maamulka Maaliyadda Dawladda. Wasiirka ayaa isna leh la xisaabtanka dhammaan saraakiisha idman sida ay u gutaan waajibkooda shaqo si waafaqsan Xeerka.

**t.** Dhameystirnaan:- dhammaan dakhliyada iyo Kharashyada Dawladda iyo hay'adaheeda, waa in ay ka mid noqdaan oo la raaciyaa qoondooyinka Miisaaniyadda Dawladda iyo diiwaan gelinta saldhigga u ah wadarta dakhliga.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

j. Faahfaahin Cayiman:- dhammaan Kharashyada hay'adaha Dawladda waxa lagu bixin karaa oo keliya ujeeddadii gaar ahaaneed ee qoondada loogu tala galay.

x. Haykalka Siyaasada Maaliyadda:- Miisaaniyadda Dawladda waa in loo diyaariyo si waafaqsan haykalka maaliyaydeed ee muddada dhexe, Haykalka maaliyadeed waxaa ka mid ah saadaasha dakhliga iyo Kharashka Dawladda, hay'adaheeda muddada dhexe iyo istaraatiijiyadda lagu maal galinaayo haddii isdhin uu ku yimaaddo isu dheelitirka dakhliga iyo Kharashka.

**Kh.** Daah-Furnaan:- Kaalinta ay hawlwadeenada lagu aamin ay shaqada maareynta Maaliyadda leeyihiin waa in ay si hufan u cadeeyaan oo waafaqsan Xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa; in waqtigeeda lagu helo xogta maaliyadeed ee Miisaaniyadda Dawladda, tan Dawladaha Hoose, iyo Wakaaladaha/Sharikadaha ee Dawladdu leedahay ama wax ku leedahay, oo lagu kalsoonaan karo loona soo bandhigo dadweynaha.

## Qodobka 6-aad

## Lacagta Dawladda/ iyo Wadarta Khasnadda Dawladda

1. Lacagta dawladda waxay ka kooban tahay lacag ama hanti lacag u dhiganta oo ay hayso ama hoos yimaada Dawladda Puntland, oo ay ku jiraan lacag Dawladdu leedahay ee meel kale taal oo aysan ku jirin lacagaha ay hayaan meelo kale oo muddaysan ama loo hayo ururada aan dawliga ahayn, shirkadaha kale ee dawladdu leedahay. Waxaa kaloo ku jira lacagaha dawladda uu u hayo qof kale oo ay wakiilatay.
2. Hantida noqota dakhliga dawladda markii la qabto waxaa kamid ah;
   b. Cashuur kasta, oo ay ku jiraan Cashuurta Dakhliga iyo Macaashka, Badeecadaha Iyo Adeegyada, Ganacsiga Caalamiga ah iyo wareejimaha/iibka kale;
   t. Khidmo kasta, oo ay ku jiraan lacagta khidmadda Garoonka Diyaaradaha, rusuum iyo Lacago kale oo Xeerka waajibin ayo iyo kala-wareejinta shuruucdu fareyso;
   j. Dulsaar ay heshay Dawladda
   x. Faa'iido Dawladdu ka heshay shirkadaha faa'iido doonka ah oo Dawladdu wax ku leedahay
   Kh. Lacagaha laga helay iibinta hanti maguurto ah ama isticmaalka hanti Dawladeed wakhti dheer
   d. Lacagaha laga helay isticmaalka khayraadka dalka oo ay ku jiraan isticmaalka hawada, wax soo-saarka noocyadiisa kala duwan.
   r. Lacagaha Macaashka lahaanshaha la xiriira wax soosaarka

s. Ganaaxyada kala duwan; qaraamaadka, ganaaxa, iyo waayitaanka lacag hormaris ah.

sh. Deeqaha iyo hadiyadaha kale

dh. Deymaha maqnaa ee soo noqday

c. Qoondooyinka deymaha Dawladdu soo qaadan karto oo lasoo qaatay

g. Deymaha cusub ee ay Dawladdu codsatay

3. Si loogu maareeyo, si hufan oo wax ku ool ah, dhaq dhaqaaqa xisaabaadka, maamulka macaamilka maaliyadeed iyo hawlaha Dawladda Puntland waxaa la dhisayaa Sanduuqa Mideysan ee Dawladda.

4. Sanduuqa midaysan ee Dawladda waxaa lagu xeraynayaa lacagaha kasoo xerooda ilahan hoose;

   b. Dakhliga cashuuraha

   t. Dakhliga aan cashuuraha ka iman

   j. Deyn soo xerootay

   x. Deeqaha gudaha iyo dibedda

   Kh. Dakhliga kale

   d. Dakhliyada ka yimaada amaahda, hormariska, iibinta maalgashida Dawladda iyo hantida kale ee ay dawladdu leedahay

   r. Haraayada xisaabaadka kala duwan ee Dawladda Puntland waxaa la isugu geynayaa khasnadda midaysan oo ay kor kala soconayaan Golaha Wakiillada uuna fulinteeda leeyahay Wasiirka,

## Qodobka 7-aad

## Cashuur Dhaaf

1. Wasiirka oo keliya ayaa leh awoodda dhaafida canshuuraha iyo khidmadaha si waafaqsan Xeerka Cashuuraha Dawladda Puntland, Xeerka Furdooyinka iyo xeerarka kale ee la xidhiidha.

2. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda wuxuu hirgelin ayaa hannaan lagu diiwaangalin ayo laguna kaydin ayo dhammaan cashuur dhaaf kasta oo Wasiirku Sameeyo iyo sababihii cashuur dhaafkaas loo sameeyey, Wasiirka ayaana ku soo saarayaa wareegto Wasiir ah.

3. Wasiirka waa in uu ogeysiiya Golaha Wasiiradda iyo Hanti Dhawraha Guud cashuur dhaaf kasta iyo sababihii loo sameeyey muddo Bil gudaheed ah.

4. Wasiirku, waa in uu, sannad maaliyadeed kasta, maalintaas ama ka hor, 30ka Maarso, 30ka June, 30ka Sebteember iyo 31da Diseember u gudbiyaa Golaha Wakiillada cashuur dhaafyada uu oggolaaday.
5. Xogta ku cad Warbixinta Cashuur Dhaafyada ee lumbarka 4aad waxaa ku jiraya;
   - b. Shakhsiga cashuur dhaafka loo sameeyey.
   - t. Sababaha cashuur dhaafka loo sameeyey.
   - j. Wadarta cashuurta ka baaqatay Dawladda iyo
   - x. Faa'iidada Dawladda ka heleyso cashuur dhaafkan.

## Qodobka 8-aad

## Wada shaqaynta Dawladda iyo Dawladaha hoose

1. Dawladda Puntland waa;-
   - b. In ay la leeyihiin kana dhaxeeyo nidaam maaliyadeed iyaga iyoDawladaha Hoose si loo dhiiri geliyo xiriir wada-shaqeyn si waafaqsan Dastuurka.
   - t. Una soo gudbiyaan miisaaniyaddooda iyo xogta maaliyadeed dhammaan hay'adaha Dawladda iyo kuwaDawladaha Hoose ee ay xogtani khuseyso.
   - j. In ay si degdeg ah u gutaan waajibaadkooda maaliyadeed ee kaga aaddan hay'adaha kale ee Dawladaha Hoose ama Dawladda Puntland.

# CUTUBKA 2AA-D

# AWOODAHA IYO MAS'UULIYADDA MIISAANIYADDA IYO MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD DAWLADDA

## Qodobka 9-aad

## Xilka iyo Waajibaadka Golaha Wakiiladda

1. Golaha Wakiillada ayaa muus'uul ka ah ansixinta iyo in Xeer lagu soo saaro Miisaaniyadda Dawladda iyo ansixinta Kabka Miisaaniyadda ee la soo saaro inta lagu gudo jiro sannad maaliyadeedka iyo xeerarka kale ee lagu dhaqan gelinayo deymaha iyo damaanadaha Dawladda.
2. Golaha Wakiillada ayaa awood u leh in uu dib u eegis ku sameeyo soo jeedinta Miisaaniyadda, iyaga oo aan wax ka badaleyn isku-dheeli tirka dakhliga iyo Kharashka. Soo jeedinta dib u eegis kasta ee uu sameeyo Golaha Wakiilladu oo hoos-udhig ku sameynaysa dakhliga ama kor-u-qaadeysa Kharashka waa in ay ku caddahay soo jeedinta dakhliga loo baahan yahay ama kaydka lagu dabooli karo Kharash aan ku jirin Qoondada Miisaaniyadda la soo jeediyey.

3. Golaha Wakiilladu wuxuu weydiisan karaa Golaha Wasiirrada iyo shaqaalahooda farsamo, in ay Golaha hor yimaadaan si ay ugu sharraxaan, siyaasadaha, barnaamijyada iyo isticmaalka Miisaaniyadda. Golaha Wakiilladu wuxuu tix gelin ayaa waayo aragnimada iyo fikradaha dadka hor yimid ama kuwa hor tagay Guddiyada kala duwan ee Golaha Wakiilladu iyagoo bixin aya caddeymo ama talo loo baahan yahay, ha ahaato ama yeyna ahaan aragtida ama tallada mid lagu bixiyey dhaar, caddeyn la akiday oo loo soo gudbiyey oraah ahaan ama qaab qoraal ah.

## Qodobka 10-aad

## Xilalka iyo Waajibaadka Wasiirka

1. Wasiirka ayaa mas'uul ka ah dhammaan siyaasadda iyo farsamada khuseysa habsami u socodka nidaamka maareynta maaliyadda Dawladda iyo soo bandhigidda dhammaan agabka iyo dukumeentiyada uu dalbayo Xeerkan, si waafaqsan xilliga muddeysan ee ku xusan Xeerkan, iyadoo la raacayo guud ahaan siyaasadda Golaha Wasiirrada.
2. Wasiirka ayaa ka masuul ah maareynta lacagaha Dawladda, Khasnadda Midaysan, iyo in uu kaydiyo diiwaangelin sax ah iyo xisaabaadka dhammaan caddeymaha dakhliga la qabtay, bixinta iyo dheeli tirka Khasnadda Midaysan ee Dawladda.
3. Wasiirka mas'uuliyadiisa waxaa ka mid ah, diyaarinta iyo fulinta Qorshaha Maaliyadda ee Mudadda Dhexe, Miisaaniyadda Puntland, diyaarinta iyo faafinta xisaab xirka sannadlaha iyo xisaabaha sannadka gudihiisa, warbixinnada kale ee la xiriira miisaaniyadda, maamulka hantida, deymaha, dammaanadaha Xukuumadda iyo Qaamaha kale ee lama filaanka ah sida ku cad Xeerkan.
4. Si waafqsan waajibaadka uu u igmaday Madaxweynuhu, Wasiirku waa in uu horumariyaa, fuliyaana dhaqaalaha iyo Haykalka Siyaasadda Maaliyadeed ee guud ee Dawladda Puntland, ujeeddadiisuna ay tahay:-
   b. In uu kala taliyo Dawladda dhammaan dakhliga dalka sida loo qoondaynayo iyo heerka ku talagalka dakhligaas iyo heerka qoondo ee ugu habboon ee barnaamijyada ay leeyihiin qaybaha kala duwan ee waax kasta gudaheeda;
   t. In uu maareeyo iskuna dubbarido wada shaqeynta iyo xiriirka maaliyaddeed iyo dhaqaale ee caalamiga, Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland.
5. Wasiirku waa in uu hubiyaa joogtaynta, habboonaanta maaraynta maaliyadda Dawladda iyo in si caddaalad ah oo loo siman yahay loogu tartamo, lana eego wax-ku-oolnimada Kharashka iibka iyada oo la raacayo xeerka Iibka ee Dawladda.

6. Si Waafaqsan Shuruucda Dawladda Puntland ee Soomaaliya, Wasiirka ayaa yagleelaya, kadib marka uu oggolaansho ka helo Golaha Wasiirrada, qaab dhismeedka qaybaha iyo waaxyaha ay Wasaaraddu ka kooban tahay, isagoo waafajin aya shuruudaha Xeerkani jidaynayo iyadoo uu si buuxda u fuliyo hawlaha halkan ku xusan. Faah faahinta la xiriirta qaab dhismeedka iyo waaxyaha, waxaa lagu soo saarayaa Xeer-nidaamiye ama Xeer Wasiir.
7. Si Wasiirku u guto waajibaadkiisa wuxuu yeelanayaa awoodaha ah:-
   b. Kadib markii golaha Wasiiradu ansixiyaan Xeerkan, in uu asaaso faracyo wasaaradiisa ah oo qaabilsan fulinta Xeerkan.
   t. In uu ogeysiiyo Saraakiisha Idman qoraal ahaan mas'uuliyadooda ah isla xisaabtan cad iyo hufunaanta maamulka maaliyadda Dawladda iyo Hantida kale ee lagu aaminay.
   j. In uu dajiyo, kadib markuu la tashi la sameeyo mas'uuliyiinta ay khuseyso ee xubnaha Dawladda, hababka loo xiriirin ayo maaliyaddaha Dowladaha hoose.
   x. In uu soo saaro tilmaamo khuseeya xiriirada ku haboon Dawladda oo ay la yeelaneyso Bankiyadda iyo hay'adaha kale ee lacagaha.
   Kh. In uu u qaybiyo mas'uuliyadaha maaraynta maaliyadda hay'adaha kala duwan ee Dawladda.
   d. In uu u haysto awood buuxda oo fulineed xafiisyadda, saraakiisha, dukumintiyadda, diiwaanka maamulka maaliyadda iyo xeer hoosaadyadda ee hay'adaha Dawladda.
   r. In uu diyaariyo una gudbiyo golaha wasiirrada xeerhoosaadyada si ay u ansixiyaan;
   s. In uu soo saaro xeerhoosaadyo, tilmaamayaal, iyo hagayaal loo siticmaalo xisaabinta, warbixinada iyo ilaalinta hantida Dawladda Puntland.
   sh. In uu soo saaro xeerhoosaadyo, tilmaamo, iyo hagayaal ah fulinta qodobadda Xeerkan.
   dh. In uu ansixiyo furitaanka xisaab Banki ee hay'addaha Dawladda iyo qaabeynta saxiixa xisaabtaas Banki.
   c. In uu hubiyo in hay'ad walba ay leedahay nidaam lagu maareeyo khataraha, kontaroolayaasha gudaha iyo baarayaasha gudaha.

g. In uu sameeyo qaybo qaabilsan habka ilaalada hantidhowrka gudaha ee ku haboon hay'addaha Dawladda kuwaasoo shaqadoodu waafaqsan nidaamka iyo shuruucda caalamiga ah ee hantidhawrayaasha gudaha.

f. In uu sameeyo habraacyo ku habboon baarista gudaha ee hay'adaha Dawladda.

q. In uu ka dhex sameeyo wasaaradda nidaam isku xiran oo ku haboon xakamyenta kharashyada; iyo dhacdooyinka kale ee dhaqaale ee lagu galay Miisaaniyadda Dawladda, sidoo kale maamulka lacagaha.

k. In uu dajiyo habraac ku haboon in lagu maamulo, kormeero laguna warbixiyo Hantida Dawladda Puntland

l. In uu sameeyo nidaamka ku habboon Maamulka Maaliyadda, oo ay ku jiraan kala saarsaarka madaxyada hay'adaha Dawladda iyo waaxyahooda kala duwan iyo hab kastoo kale oo ah Nidaamka Kumbiyuutarka ee Hay'adaha Dawladda kuwaasoo saameynaya maamulka maaliyadda.

8. Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha Xeerkan uu siinayo Wasiirka wuxuu u xilsaaran karaa ku xigeenadiisa ama mas'uuliyiinta kale ee Wasaaradda. Mas'uuliyad kasta oo uu Wasiirku u xilsaaray qof kale wuu bedeli karaa kamana qaadayso mas'uuliyadda ugu danbaysa ee uu Xeerkani farayo.

## Qodobka 11-aad

## Xisaabiyaha Guud

1. Xisaabiyaha guud waxaa magacaabaya Madaxwaynaha Dawladda Puntland, wuxuuna u madax-banaan yahay shaqada Xafiiska isagoo raacaya Xeerarka iyo habraayada Maaliyadda.
2. Xilalka iyo Waajibaadka Xisaabiyaha Guud waxaa ka mid ah.

b. In uu maareeyo Xisaabaadka Miisaaniyadda Dawladda ilaaliyana xisaabaadka hay'ad kasta ee Dawladda.

t. In uu fasaxo lacagaha ka baxaya Khasnadda Mideysan ee Puntland, marka uu Golaha Wakiilladu ansixiyo Miisaaniyadda Dawladda.

j. In uu kormeero, baaro, geli karana dhammaan xafiisyada Hay'adaha Dawladda ee lacagta iyo hantida Dawladda Puntland gacanta ku haya, maamula ama xafida.

x. In uu soo saaro amaro joogtaynaya nidaamka ilaalinta ballan-qaadyada ilaalinta korjoogtaynta, diiwaangelinta, iyo warbixinta ballanqaadyada hay'adaha Dawladda.

kh. In uu guddoomiyo Guddiga Maamulka Khasnadda Mideysan, warbixinna ka siiyo Wasiirka.

d. In uu soo saaro saadaasha lacagaha naqdiga ee Khasnadda Mideysan ee Dawladda.

r. In uu diyaariyo Xisaabaadka Khasnadda Mideysan ee Dawladda, soona jamciyo xisaabaadkooda oo dhan. Mas'uul ka ahaado soo saarista, wax ka bedelka shaxda xisaabaadka iyo hirgelinta nidaamka xisaabaadka danabaysan.

s. In uu kormeero xaqiijiyana sax ahaanshaha qabashada iyo bixinta lacagta Dawladda, maareynta lacagaha naqdiga ah iyo kaydka Dawladda, sida la isugu gudbiyey lacagaha Dawladda, dammaanadaha, shaabadaha iyo hantida kale ee Dawladda Puntland.

sh. In uu guto waajibaad kasta oo kale oo xeer ama xeer-nidaamiye lagu soo saaray.

3. Xisaabiyaha Guud ee Puntland wuxuu kala shaqaynayaa Xisaabiyaha Guud ee Dawladda Federaalka, wixii ku saabsan xisaabaadka dalka, warbixinada ku saabsan lacago isu gudbinta Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland.
4. Guddiga Maamulka Khasnadda Guud waa in uu Wasiirku magacaabo, waxaana hawshooduna tahay in ay dib-u- eegis ku sameeyaan saadaasha lacagta naqdiga ah, kor joogteynta, isku-xirka maamulidda lacagta naqdiga ah iyo daymaha Khasnadda Mideysan ee Puntland. Waajibaadka shaqo iyo xubnaha ay ka koobnaan doonaanba waa in Wasiirku ku soo saaraa xeer-nidaamiye heer Wasiir ah.

## Qodobka 12-aad

## Hanti Dhowraha Guud

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Puntland wuxuu wada shaqayn la yeelanayaa Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, kuwa Dawladda Puntland iyo wixii la xiriira kab miisaaniyadeed dhex mara heerarka Dawladda ee kala duwan.

## Qodobka 13-aad

## Saraakiisha Idman

1. Hay'ad Wakaalad iyo Mashruuc kasta ee Dawladeed waxaa loo magacaabayaa Sarkaal Idman kaas oo ah sarkaalka mas'uulka ka ah hay'adda ama mashruuca, iyadoo loo marayo habraaca qorista saraakiisha Dawladda. Saraakiil dheeri ah ayaa Madaxweynuhu soo magacaabi karaa xilliyada qaarkood:

b. Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada DPL.

t. Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada .

j. Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha.

x. Agaasimayaasha Guud ee Hay'adaha Madaxa-bannaan.

Kh. Guddoomiyayaasha hay'adaha iyo shirkadaha Dawladdu leedahay.

2. Sarkaal kasta oo idman ee hay'adaha iyo shirkadaha Dawladda wuxuu mas'uul ka yahay dhammaan arrimaha la xiriira maamulka lacagaha dadweynaha, hantida iyo qaamaha hay'adaha Dawladda ee uu mas'uulka ka yahay, taasi oo ay ka mid yihiin iyadoo aysan ku koobnayn:-

b. Diyaarinta qorsha sannadeedka, miisaaniyadda iyo ku-tala-galka Kharashka ee qorshaha xilliga dhexe ee hay'adda uu masuulka ka yahay.

t. Ilaalinta iyo kor-joogteynta fulinta Miisaaniyadda hay'adda uu masuulka ka yahay, si waafaqsan Xeerkan, xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada Wasiirka.

j. Haynta xisaabaadka iyo diiwaannada hay'adda uu masuulka ka yahay si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha ama hageyaasha uu soo jeediyo Xisaabiyaha Guud.

x. Diyaarinta iyo u-gudbinta warbixinnada Wasaaradda ama Xisaabiyaha Guud sida uu qabo Xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha ama hageyaasha raacsan Xeerkan.

kh. Diyaarinta iyo hirgalinta qorshaha Kharashka baxaya isagoo la tashanaya wasaaradda waana in uu ogolaadaa Wasiirku.

d. Maareyn hufan, wax-ku-ool ah, oo daah-furan lagu maamulo dhammaan lacagaha hay'adda.

r. In si hufan, wax ku ool ah, oo daah-furan loo yagleelo ilaalinta gudaha maareynta khataraha iyo baarisaha gudaha.

s. Kormeeridda iyo xaqiijinta in sida ugu habboon loo isticmaalo lacagaha Dawladda ee hay'dda uu masuulka ka yahay hoos yimaadda.

sh. Bixinta macluumaad kasta oo ay ka dalbadaan Wasaaradda iyo Xafiiska Hanti Dhowraha Guud.

dh. Fulinta soo-jeedimaha hanti-dhowrista ee ay Wasaaradda iyo Hanti Dhowraha Guud soo jeediyeen.

c. Xaqiijinta ku-dhaqanka dhammaan qodobada ku xusan Xeerkan iyo xeernidameyaasha kale ee uu soo saaro Wasiirku iyo Shuruucda kale ee la xiriira Maareynta Maaliyadda Dawladda.

g. In uu diyaar u noqdo in Golaha Wakiiladu kala xisaabtami doono dhammaan lacagaha Dawladda iyo hantidii lagu aamin ay hay'adda uu mas'uulka ka yahay.

## QEYBTA 3AAD

## DIYAARINTA IYO ANSIXINTA MIISAANIYADA

### Qodobka 14aad

### Qorshaha Siyaasadda Miisaaniyadda

1. Wasiirka ayaa mas'uul ka ah diyaarinta iyo faafinta buugga Haykalka Siyaasadda Maaliyadda Xilliga Dhexe, kaasoo daboolaya muddo seddex sano ah, kana bilaabaneysa sannad maaliyeedka xiga. Markii sannad dhamaado waxaa lagu sii darayaa sannad kale si mar walba loo hayo 3 sannadood.
2. Buugga Haykalka Siyaasadda Maaliyadda Xilliga Dhexe waa in ay ku jiraan ugu yaraan:-
   b. Qoraal ka hadlaya Puntland yoolasheeda siyaasadeed ee la hirgelin ayo xilliga dhexe iyo kan fog.
   t. Saadaasha Dhaqaalaha Guud ee waddanka saddexda sano ee soo socota.
   j. Qiimeynta isbadaladdii ugu dambeeyey ee ku yimid horumarka dhaqaalaha guud iyo natiijada ka soo baxday Miisaaniyadda.
   x. Saadaasha Dakhliga iyo Kharashka Miisaaniyadda Dawladda Puntland sadexda sano ee soo socota.
   kh. In la muujiyo farqiga iyo qorshaha maaliyadeed ee lagu dabooli lahaa Miisaaniyadda saddexda sano ee soo socota.
3. Xeer-nidaamiye ayaa lagu caddeynayaa muddada iyo hab-raaca loo diyaarinayo faafinta Buugga Haykalka Siyaasadda Maaliyadeed ee Xilliga Dhexe.

### Qodobka 15aad

### Qaab-Dhismeedka Miisaaniyadda

1. Wasiirku waa in uu hubiyaa in diyaarinta Miisaaniyaddu waafaqsan tahay siyaasadda muddada dhexe.
2. Dhammaan Dakhliga iyo Kharashaadka ee Khasnada Mideysan waa in loo kala sooco sida ay iskugu midka yihiin labada dhinac ee Miisaaniyadda iyo Xisaabaadka. waa in uu waafaqsan yahay hannaankan.
   b. Kala saarida miisaaniyadda waa in uu waafaqsan yahay nidaamka Qaramada Midoobay ee noocyada shaqo eeDawladaha, ugu yaraan kala soocid maamul iyo

dhaqaale kuwaas oo waafaqsan habraaca xisaabaadka caalamiga ah ee Hay'adda Lacagta Adduunka.

t. Wasiirka ayaa mas'uul ka ah diyaarinta iyo kala saar-saarka qaabka miisaaniyaddu isu raac-raacayso, wuxuuna soo saarayaa tilmaamo faah-faahsan ku diyaarinta, fulinta miisaaniyadda iyo xisaabaadka, kadib markuu hubiyo in qolo walba u diyaarsan tahay.

j. Haddii isbedel lagu sameeyo qaabka kala saarsaarka kadib markii Golaha Wakiilada loo diray, Wasiirku waa in uu ogaysiin hore u diraa Golaha Wakiilada ugu yaraan 30 cisho kahor inta aan miisaaniyadda la horgeyn.

x. Wasiirku waa in uu u diraa Golaha Wakiillada iyo Xafiiska Hantidhawrka faah-faahin buuxda oo ku saabsan kala saarsaarka cusub iyo saamaytooda xisaabaadka, waa in warbixinno laga diyaariyaa, xogtana la kaydiyaa si ay u fududaato marka la isku aadinayo xisaabtii hore iyo tii la bedelay.

Kh. Kala saar-saarku waa in uu waafaqsan yahay nidaamkan hoose: -

i. Dakhliga iyo hantida kale waxaa loo nidaamin ayaa madaxyo faah-faahintooda lagu sheegi doono xeer nidaamiyeyaal ka farcamaya Xeerkan.

ii. Kala soocidda maamul ee Miisaaniyadda waa in ay waafaqdo liiska Hay'adaha Dawladda iyadoo loo sii sarrifayo waaxyo iyo qaybo hoose oo aawood u leh in ay kharakh baxshaan. Waxaa kaloo loo kala saarsaarayaa nooca kharash sida lagu sheegi doono xeer nidaamiyeyaasha laga hoos samayn doono Xeerkan.

iii. Kharashaadka aan khusayn Hay'ad Dawladeed ee uu wasiirku mas'uulka ka yahay sida bixinta deymaha iyo kharashaadka kale ee dastuurku khasab ka dhigayo, waa in loo maamulo sida lagu sheegay qodobka 9 (2) ee Xeerkan.

## Qodobka 16-aad
## Aasaaska Guud iyo Guud-marka Miisaaniyada.

1. Miisaaniyadda waa in ay ka koobnaataa dhammaan dakhliga iyo kharashka Dawladda Puntland oo ay ku jiraan dhammaan wareejinnada loo wareejiyoDawladaha hoose, hay'adaha madaxa bannaan, deeqaha, shirkadaha Dawladdu wax ku leedahay, Bankiyada, hay'adaha aan faa'iida doonka ahayn, ama shaqsiyaad.
2. Iyadoo la isticmaalayo xog sugan, miisaaniyadda waa in lagu daraa kabista miisaaniyadda toos looga helo deeq bixiyeyaasha, kabista guud, deeqaha loogu talo galay meelo gaar ah, iyo mashaariicda.

3. Miisaaniyadda waa in ay noqoto hal miisaaniyad oo mideysan oo ka kooban Miisaaniyadda joogtada ah iyo tan Raasumaalka ah.

## Qodobka 17-aad

## Dakhliga Dheeriga ah

Miisaaniyadda waa in ay ka muuqataa hadii dakhligu ka badan yahay kharashka ama kharashku ka badan yahay dakhliga oo aysan ku jirin deymahu. Marka dakhliga soo galay uu ka bato qiyaastii miisaaniyadda la filayey, dakhliga dheeriga ah looma isticmaali karo kharash ahaan, iyadoo aan laga haysan oggolaansho Golaha Wakiillada.

## Qodobka 18-aad

## Jadwalka iyo Xilliga Diyaarinta Miisaaniyadda Sannadlaha.

1. Wasiirku waa in uu diyaariyaa, shaaciyaana jadwalka diyaarinta miisaaniyadda oo ay ku jiraan qodobadan hoose, sidan ay isugu xigaan:
   b. Diyaarinta iyo faafinta buugga Haykalka Siyaasadda Miisaaniyadda xilliga dhexe.
   t. U soo saaridda Hay'adaha Dawladda Wareegtada Soo-gudbinta Miisaaniyadda oo waafaqsan siyaasadda xilliga dhexe iyo xadka loo sameeyey, qaabka loo soo gudbin ayo iyo wakhtiga la soo gudbin ayo.
   j. Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda waa in ay qabataa kulamo lagu wargelin ayo shacabka lagalana tashanayo, siyaasadda Miisaaniyadda sannadka soo socda
   x. Isu geynta miisaaniyadda ay soo gudbiyeen dhammaan hay'adaha dawladda.
   kh. Wada-xaajood u dhexeeya Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'adaha oo ku saabsan soo jeedinta miisaaniyadda iyo in ay waafaqsan tahay siyaasadda Dawladda iyo dhaqaalaha.
   d. U gudbinta Miisaaniyadda Golaha Wakiilada.
   r. Ansixinta kadib waxaa dhammaan hay'adaha Dawladda loo dirayaa Miisaaniyaddii oo ansaxsan si ay u dhaqan geliyaan.
2. Dhammaan qodobadan kore waa in la maraa si loo ansixiyo Miisaaniyadda sannadka dambe inta uusan dhammaan sannadka lagu jiro.
3. Waaxda Miisaaniyadda ee Dawladda Puntand waxay la wadaagaysaa nuqul miisaaniyadda ah waaxda miisaaniyadda ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 19-aad

## Dukumintiyada iyo Tusmooyinka soo jeedinta Miisaaniyadda

1. Soo jeedinta Qoondada Miisaaniyadda uu u gudbiyey Wasiirku, Golaha Wakiillada waa in ay ku jiraan; -

   b. Buugga Haykalka Siyaasadda Maaliyadda

   t. Qabyo qoraalka xeerka qoondada iyo faah-faahinta dakhliga la filayo iyo qoondooyinka iyo warbixin ay ku jiraan natiijadda isbedelka Miisaaniyadda sannadkii tagay iyo sannadka soo socda.

   j. Xeer maaliyadeedkaas oo qeexaya qiimaha tacrifada cashuur ahaan loo qaadayo iyo dakhliga kale ee aan Cashuurta ahayn ee sannad maaliyadeedka soo socda, kaasoo waafaqsan dakhliga miisaaniyadda

   ee la filayo oo ay ku jiraan qiyaasta Cashuur kasta oo kale oo cusub ama isbedelka qiimaha tacriifada Cashuurta ee jira, taasoo loo gudbin ayo Golaha Wakiillada kama dambays maalinta la gudbin ayo miisaaniyadda.

   x. Lifaaq sheegaya inta ay la egtahay daymaha lagu leeyahay Dawladda iyo damaanadaha Dawladdu samaysay.

   Kh. Lifaaq soo koobaya kharashka hawlgal ee hay'adaha madaxa bannaan, tilmaamayana qoondada miisaaniyadda Dawladda laga siin ayo.

   d. Lifaaq soo koobaya qorshaha maaliyadeed iyo hawgal ee sannadkaas ee hay'adaha Dawladdu leedahay ama bankiga. Qaabka lifaaqaas waxaa lagu sheegi doonaa xeer nidaamiyeyaasha ka farcamaya Xeerkan.

   r. Lifaaq si kooban u tilmaamaya dhammaan lacagaha laga helo deeq bixiyeyaasha, isagoo kala saaraya lacagaha loogu talo galay Dawladda Puntland iyo meelaha kale. Qaabka loo dhigayo lifaaqaas waxaa lagu sheegayaa xeer nidaamiyeyaasha uu Wasiirku ka soo saari doono Xeerkan hoostiisa.

   s. Lifaaq si kooban loogu muujin ayo shaxaha cashuuraha ee sanadka soo socda.

2. Waxaa kaloo la tixgelin ayaa iyadoon laga tagayn qodob 19 1.j, shuruuc, siyaasado iyo cabir kale oo sababi kari isbedel siyaasadaha dakhliga cashuuraha iyo dakhliga aan cashuuraha ahayn iyadoo la horgayn doono Golaha Wakiillada.

## Qodobka 20-aad

## Qoondeynta Lama Filaanka Miisaaniyadda

1. Golaha Wakiillada ayaa ansixin doona qoondada ku-tala gal aan la fileyn oo aan ka badneyn 5% wadarta guud ee Dakhliga gudaha, sida lagu saadaaliyey Miisaaniyadda oo loogu talo galayo in uu daboolo Kharash ay baahi deg deg ahi keentay ama kharash aan hore loo sii saadaalin oo aan ku-talogal kale ugu jirin Miisaaniyadda.
2. Qoondada ku talogalka aan la filayn waxaa lagu bixin karaa kharash si degdeg ah loogu baahan yahay in la bixiyo isla sannad maaliyadeedkaas, kharashkaas oo aan horayn loogu saadaalin miisaaniyadda sannadlaha ah, Isla markaana aan Kharash bixintaa dheeriga ah dib loo dhigi karin inta laga gaadhayo miisaaniyadda ku celiska ah ee kabka Miisaaniyadda ama aan kharsh bixintaas Miisaaniyadda sannadka dambe lala sugi karin, oo aan u keenayn dhaawac danta guud ee Dawladda.
3. Isticmaalka qoondada lama filaanka loogu talo galay waa in Wasiirku la socodsiiyaa guddiga dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada 3 biloodka ku xiga iyadoo la sheegayo bisha uu kharashkaas baxay.

## Qodobka 21-aad

## La-socodka Miisaaniyadda ee dadwaynaha

Marka miisaaniyadda la ansixiyo waa in si degdeg ah loogu fududeeyo dadweynaha in ay heli karaan lana socon karaan.

## Qodobka 22-aad
## Ansixinta Miisaaniyada

1. Golaha Wakiiladdu wuxuu ansixinayaa Xeerka Qoondada Miisaaniyadda si waafaqsan Dastuurka DPL.
2. Miisaaniyadda Goluhu ansixiyo waxay noqonaysaa sharci, waana hal sannad maaliyadeed oo ku-eg dhammaadka sannad maaliyadeedka la ansixiyey sannadka ku xiga.
3. Xeerkan Sannadlaha ah ee ku talo-galka qoondada Miisaaniyadda waa in la meel mariyo ka hor bilowga sannad Maaliyadeedka loogu talo galay.

## Qodobka 23-aad

## Wax ka bedelka qoondada Miisaaniyadda ee Golaha Wakiillada

Marka uu Golaha Wakiilladu ansixin ayo qoondada Miisaaniyadda ee uu hor keenay Wasiirku, Goluhu waxay soo jeedin karaan wax ka bedel iyagoo bixin aya sharraxaad wax ka bedel kasta oo ay soo jeediyaan, tilmaamayana madaxyada Miisaaniyada ay ka muuqanayso, soona jeedin aya in isbedelkan uu waafaqsan yahay siyaasadda dhaqaale ee Dawladda Puntland iyagoo hubin aya in qoondadu ay ka tarjumayso sida ugu wanaagsan ee waxqabadka.

## Qodobka 24-aad

## Isticmaalka miisaniyadda ku-meelgaarka ah

1. Haddii Golaha Wakiilladu meel-marin waayo miisaaniyadda ka hor bilowga sannad maaliyadeedka, Waxaa lagu sii dhaqmayaa miisaaniyadii hore muddo bil ah sida ku cad qodobka 135-aad farqadiisa 5-aad ee Dastuurka.
2. Isticmaalka miisaaniyadda ku meelgaarka ah waxay ku salaysan tahay qoondada la horgeeyey Golaha Wakiillada.
3. Inta lagu guda jiro muddada isticmaalka ku meelgaadhka ah ee miisaaniyadda, awoodsiinta Kharashbixintu waa in ay ku xaddidan yihiin 1/12 wadarta guud ee Kharashka ka muuqata madax-xigeen kasta ee Qoondada Miisaaniyadda bil kasta oo ka mid ah muddada ogalaanshaha
4. Marka Kharashku leeyahay mudo xaddidan oo lagu bixin ayo ay ku soo aado waqtigan Isticmaalka ku meelgaadhka ee Miisaaniyadda waa suuro gal in la bixiyo dhammaan wadarta ay waajibtey kharshbixinteedu, balse haddii wakhtiga bixinteeda ka baxsan yahay muddada ku xusan qodobkan (1) lacagtaas waa in aan la isticmaalin ama la bixin.

## Qodobka 25-aad

## Kabidda iyo ku Noqoshada Miisaaniyadda ee Sannadka Dhexdiisa

1. Inta lagu guda jiro sannad miisaaniyadeedka la ansixiyey, waxaa wax laga bedeli karaa Miisaaniyadda iyada oo la isticmaalaayo qaab kab Miisaaniyadeed oo uu soo diyaariyey Wasiirku, Golaha Wakiilladuna ansixiyey.
2. Diyaarinta, ansixinta iyo fulinta kabka miisaaniyadda wuxuu marayaa inta uu maro miisaaniyadda guud ee Dawladda sida Xeerkan dhigayo

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA STATE GENERAL SOLICITOR

3. Wasaaraadu waa in ay u gudbisaa Golaha Wakiiladda warbixinta bartamaha sannad maaliyadeedka ee fulinta Miisaaniyadda, ugu danbayn 15 bisha Luuliyo ee sannad kasta.
4. Warbixinta waxaa lagu soo lifaaqayaa taxliilka dakhliga soo xarooday, kharashyada baxay lixda bilood ee hore sannad maaliyadeedka iyo hadii loo baahdo talo soo jeedin kab miisaaniyadeed oo u baahan ogalaanshaha Golaha Wakiiladda.
5. Si loo hubiyo in Golaha Wakiillada aan loo gudbin laba miisaaniyadood oo kala duwan xilliga miisaaniyadda la ansixin ayo, waa in Wasiirku hubiyaa in miisaaniyadda kabka loo gudbiyaa Golaha Wakiillada ugu danbay 15ka Luuliyo isla sannad maaliyadeedka uu kabku khuseeyo.
6. Golaha Wakiiladdu wuxuu ansixiyaa kabka miisaaniyadda kal-fadhiga loo soo gudbiyey dhexdiisa.

## Qodobka 26-aad

## Saamaynta Dhaqaale ee Dhaqangelinta Hindisaha xeerarka

1. Dhammaan hindsaha xeerarka ee laga rabo oggalaanshaha Golaha Wakiillada waa in la soo raaciyo cadeymo sugaya saamayntooda miisaaniyadeed, oo sheegaya shuruucdaas sida ay raad ugu yeelan karaan dakhliga iyo Kharashyada sannad maaliyadeed kan iyo saamaynta qorshe iyo miisaaniyad ee dhowrka sano oo ku xigaba.
2. Wasiirku waa in uu soo diyaariyo tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan nooca faahfaahin oo loo baahan yahay iyo habraaca lagu xaqiijinaayo saamaynta dhaqaale ee hindisaha xeerarka.
3. Wasiirku waa in uu usoo raaciyaa fikraddiisa ku aaddan Golaha Wakiillada suurto-galnimada faahfaahinta saamaynta dhaqaale ee la soo diyaariyey.

## MADAXA 4-AAD

## DHAQAN GELINTA MIISAANIYADDA

## Qodobka 27-aad

## Masuuliyadda Dhaqangelinta Miisaaniyadda

1. Wasiirka ayaa masuul ka ah maamulka guud ee fulinta miisaaniayadda Dawladda iyo midda kabka ah.
2. Wasiirku waa u wakiilan karaa mas'uuliyadihiisa qayb ahaan ama dhammaantood shaqooyinka la xiriira dhaqan-gelinta Miisaaniyadda Xisaabiyaha Guud, Kaasoo masuul uga noqonaya Wasiirka habraacyada oo dhan, maamulka iyo sii daynta

kharashaadka miisaaniyadda, lacagta iyo maamulidda heshiisyada kharash ee hay'adaha Dawladda ee qoondada leh. Awoodda loo wakiishay Xisaabiyaha Guud waa in ay waafaqsan tahay shuruucda kale ee qeexaysa awoodaha ku xigeennada iyo kuwa kale ee awoodaha sharci leh oo ka mid ah saraakiisha Dawladda. Wakiilashadaan mas'uuliyadeed waa in lagu sheegaa xeer nidaamiye laga hoos sameeyo Xeerkan, aysanna noqon mid ka qaadaysa xilka iyo awoodaha wasiirka iyo mas'uuliyadaha guud ee uu Xeerkan ku waajibiyey.

3. Saraakiisha Idman, ee ku xusan qodobka 12 ee Xeerkan, ayaa mas'uul ka ah u fulinta si sax ah uguna habboon miisaaniyadda hay'adda loo xilsaaray sida uu qabo Xeerkan, xeer nidaamiyeyaasha ka farcamay, iyo tilmaamaha iyo amarada uu Wasiirku soo saaray. Sidoo kale, waxay si buuxda u hoos tegayaan Wasiirka iyo Golaha Wakiillada inta ay ku jiraan fulinta miisaaniyadooda.
4. Saraakiisha Idman waxay si qoraal ah ugu xilsaari karaan awoodaha fulinta dhaqan-gelinta Miisaaniyadda saraakiil kale oo kala shaqeeya hay'adaha ay maamulaan. Wakaalashada noocaas ah waa in aysan ka wareejin sarkaalka, Wasiirka iyo madaxda kale mas'uuliyadda uu Xeerkani iyo hab-raacyadiisuba ku waajibiyeen.

## Qodobka 28-aad

## Heerarka Fulinta Miisaaniyadda

Si loo kabo xeer nidaamiyeyaasha laga soo hoos saaray Xeerkan, waa in Wasiirku soo saaraa tilmaamo iyo hagaayaal qeexaya heerarka kala duwan ee fulinta miisaaniyadda oo ay ku jiraan oo aan ku ekeyn qoondo meel loo dhigay iyo ballamada kharash bixin. Habraacyada iibka oo ay ku jiraan wax soo iibsiga iyo bixintooda waana in ay waafaqsanaadaan Xeerka Iibka Dawladda.

## Qodobka 29-aad

## Xeerarka Guud ee la Xiriira Fulinta Miisaaniyadda

1. Habraacyada fulinta miisaaniyadda waxaa lagu qeexayaa xeernidaamiyeyaasha ka farcamaya Xeerkan, waxaana lagu sii faahfaahin ayaa tilmaamo iyo qoraallo uu Wasiirku soo saari doono mustaqbalka.
2. Koontaroolka guud ee fulinta miisaaniyadda waxaa hagaya habraacyadan hoose oo loo isticmaalayo dhacdo walba sida kharash bixin iyo dakhli xerayn.

   b. Waa in aysan dhicin ballan qaad iyo Kharash bixin ay sameeyaan Hay'adaha Dawladdu oo ka badan ama ka baxsan qoondada

Miisaaniyadda, waxa ayna ku xidhan tahay lacagaha loo hayo ee ku cad qoondooyinka kala duwan ee Miisaaniyadda si waafaqsan farqada (b)

t. Wadarta guud ee astaynta qoondooyinka kala duwan ee hay'ad Dawladeedee sannad maaliyadeed, waa in aysan ka badan qoondada sannadka loogu ogolaaday Xeerka miisaaniyadda ee sannadkaas. Waxaa dhici karta in isbedello lagu sameeyo isla sannadkaas iyadoo loo marayo qodobada ku xusan qodobka 19-aad ee Xeerkan iyo Xeerka kabka ee soo baxa sannadka dhexdiisa.

3. Bixinta dulsaarka deymaha waa in si ku filan loo qiyaasaa oo miisaaniyadda lagu daraa ama kabka danbe ee sannadka dhexdiisa laga ansixiyo Golaha Wakiillada, Faahfaahinta sida loo bixinayo dulsaarka deymaha waxaa lagu saarayaa xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan.
4. Inta aan ka ahayn kharash muddo kooban ay Dawladdu u baahato in ay ku bixiso adeeg, iyadoo la waafajinayo shuruucda, khasnadda guud lagama bixin karo kharashka adeegyada maamulka aan ka ahayn inta lagu xusay qiyaasta miisaaniyadda sannadlaha ah taasoo wax laga bedelo mararka qaar xilliga ku noqoshada miisaaniyadda.

## Qodobka 30-aad

## Dakhliga Sannadka iyo Qorshaha kharash Bixinta

1. Dakhliga la ururiyo iyo kharashka la bixiyo sannadka waxaa aasaas u ah qorshe sannadle ah oo qaabka iyo sida loo diyaarinayo lagu qori doono xeernidaamiye ka farcamaya Xeerkan.
2. Wasiirku wuxuu u baahan yahay muddo 30 shaqo maalmeed kadib ansixinta miisaaniyadda Dawladda, in dhammaan wasaaradaha iyo madaxda hay'adaha kale ee qoondo ku leh miisaaniyadda in ay diyaariyaan una gudbiyaan Wasaaradda qorshohooda kharash iyo haddii ay jiraan dakhli soo ururin, wakhtiga dakhliga la filayo oo loo sii kala jajabiyey bil-bil, taasoo dib loo eegi karo mararka qaarkood.
3. Kadib ansixinta miisaaniaydda sannadka ee Golaha Wakiillada, Wasiirku waa in uu:-

   b. Wasiirada iyo madaxda hay'adaha kale qiyaasta qoondada miisaaniyadeed loo soo ansixiyey.

   t. Wasaaradaha iyo Hay'adaha leh masuuliyad dakhli ururin oo laga rabo qorshe sannadeed ee ururinta dakhliga, oo loo sii kala jajabiyey bil-bil, waa in Wasiirkaas ama madaxa hay'adaas diyaariyaa qorshe kharash bixin ee sannadkaas oo u kala jajaban bil-bil, sidoo kale ururinta dakhliga oo loo kala saarsaaray, Cashuur,

Dakhliga ka yimaada furdooyinka, khidmadda wax soo saarka iyo khidmadaha kale ee aan ahayn cashuur, Sidoo kale dakhli kale oo hay'adaas hesho iyo sida loo qoondeeyey oo ay ku jiraan haraayadii ugu haray khasnadda midaysan, deeqaha dibedda laga helayo iyo deymaha gudaha iyo dibedda.

j. Diyaariyaa qorshaha bixinta dulsaarka deymaha oo loo kala jejebiyay bil bil.

x. Isu geeyo dhammaan qorsheyaasha kala duwan, sameeyo wixii wax ka bedel ah ee ay isku afgarteen dadka ay khusayso si loo hubiyo in dhammaan qaamaha nagu waajibay loo bixiyo wakhtigii loogu talo galay ee sannadkaas.

Kh. Ansixiyo qorsheyaasha dibna loogu celiyo hay'adaha.

d. Diyaariyo una diro qolo walba qiyaasta loo ansixiyey iyo madaxyadooda.

## Qodobka 31-aad

## Heshiisyada iyo Iibka

1. Dhammaan iibka alaabada iyo adeegga oo ay ku jiraan maalgelinta hantida maguurtada ah waa in ay waafaqsan yihiin Xeerka Iibka ee Dawladda Puntland iyo Xeerka Iiibka Dawladda iyo dhammaan xeernidaamiyeyaashooda.
2. Dhammaam heshiisyada iibka ee Dawladda waa ballanqaad ay gashay Dawladdu.
3. Iyadoo la tixgelinayo Xeerka heshiiisyada iibka ee soconaya sannado badan waxaa loogu samaynayaa qoondo sannadeed miisaaniyadda la ansixiyey, iyadoo lagu sixi karo ku noqoshada miisaaniyadda ama wareejinada madaxyada.
4. Dhammaan heshiisyada iibka, waxaa loo raacayaa xeerka iibka dawladda Puntland.
5. Dhammaan heshiisyada la galay waa in ay ka muuqdaan qorshaha iibka ee sannadka ee Wasaarad kasta iyo Hay'ad kasta oo Dawladeedsida ku qoran Xeerka iibka. Qorshaha iibka ee alaabada iyo adeegyada kala duwan waa in loo diyaariyaa si waafaqsan madaxyada miisaaniyadda noocyada kharashaadka kala duwan loona gudbiyaa Wasiirka si ay u noqoto caddaymaha qorshaha kharash ee sannadka.

## Qodobka 32-aad
## Hubinta Balan Qaadyadda

1. Dhammaan kharash bixintu waxay maraysaa habraacyada hubinta ballan qaadyada ee kusoo bixi doona xeerni-daamiye ka farcamaya Xeerkan.
2. Hay'adaha Dawladdu waxay samayn karaan ballanqaad, bixinna karaan kharashka in le'eg qoondada miisaaniyadooda iyadoo la hubinayo in loo hayo lacag.

GARYAQAANKA GUUD STATE GENERAL

3. Ballanqaad waa la geli karaa sannad maaliyadeedkan, haddii ballan qaadku dhaafsiisan yahay hal sannad maaliyadeed, kharashka la bixinayo sannad maaliyadeedka lagu jiro waa in uusan ka badan qoondada sannadka loo ansixiyey.
4. Haddii aan lagu sheegin xeer-nidaamiye ka farcama Xeerkan, dhammaan ballan qaadyada waa in Wasiirka ama qof uu u wakiishay laga helaa ogolaansho.
5. Dhammaaan ogolaanshaha ballan qaadyada waa in ay marka hore hubiyaan in loo hayo qoondo miisaaniyadeed madaxa loo rabo ballan qaadka.

**Qodobka 33-aad**

**Oggolaansho Kharash Bixin**

1. Xisaabiyaha Guud ayaa sameynaya bixinta dhammaan Kharashyada ka baxaya Misaaniyadda, isaga oo keliya ayaa leh awoodda ogollaashaha bixinta kharashyada ay soo codsadaan Hay'adaha Dawladdu isaga oo faraya Bankiga Dawladda Puntland in uu kharashaadkaas ka bixiyo Xisaabta Khasnadda
Midaysan ee Dawladda.
2. Codsi Kharash bixin kasta waa in marka hore oggolaansho laga haysto Xisaabiyaha Guud.
3. Bankiga Dawladda ayaa mas'uul ka ah bixinta Kharashyada sida uu amray Xisaabiyaha Guud iyo ciddii kale ee saxiix idman ku leh xisaabta Khasnadda Midaysan ee Dawladda.
4. Kharash bixin walba ee la oggolaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhammaan dukumeentiyada kaabaya sida ku qeexan Xeernidaamiyaha Wasiirku soo saaray.
5. Kharashka la bixin ayo waxaa la siin karaa oo keliya cidda diiwan gashan, Tani waxa ku jira Kharash bixin aan Mushaar ahayn iyo takaaliifta-safarrada ee la siiyo shaqsiyaadka awalba ka qaata Misaaniyadda mushaar, gunno, macaash ama magdhow kale. Ganacsatada leh shati waa in laga diiwan geliyaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

**Qodobka 34-aad**

**Kala wareejinta Qondooyinka Miisaaniyadda Dawladda**

1. Kadib ansixinta Miisaaniaydda, lacag wareejin kasta ee miisaaniyadda dhexdeeda ah waa in ay waafaqsan tahay Xeerka miisaaniyadda.
2. Wadarta kala wareejinnada miisaaniyadda, waa in lagu warbixiyaa ama lagu xusaa warbixinta Wasiirka ee 3 biloodlaha ah.

3. Lacag lagama wareejin karo madax mushaar iyadoo loo wareejinayo madax kharash ee kale.
4. Dhammaan kala wareejinnada sannad maaliyadeedka waa in uusan ka badan 10% qoondadii kharashka ee miisaaniyadda.
5. Wixii ka bata qoondadii miisaaniyadda ee la ansixiyey oo aan laga buuxin Karin kala wareejinnada waa in lagu daraa kabka miisaaniyadda ee sannadka dhexdiisa la sharciyeeyo iyadoo la sheegayo madaxa lacagtaas laga soo wareejinayo iyo isbedellada ay ku keenayso madaxyada kale.

**Qodobka 35-aad**

**Dhicitaanka Qoondooyinka Dabayaaqada Sannad Maaliyadeedka**

1. Dhammaan qoondooyinka aan la isticmaalin iyo dhammaan qaybihii miisaaniyadda ee aan la ballan-qaadin, waxa ay dhacayaan dhammaadka sannad Maaliyadeedka.
2. Dhammaan haraaga qoondooyinka la ballan qaaday balse aan la bixin ka hor sannad Maaliyadeedka dhammaadkiisa waa la haynayaa si loogu bixiyo balanqaadyadaas muddo ku siman soddon (30) maalmood laga bilaabo dhammaadka sannad maaliyadeedkii hore. Wixii xilligaas ka danbeeya waxaa loo wareejin ayaa xisaabta midaysan ee Dawladda. Diiwaan gelinta, xisaabinta iyo warbixinta lacagaha aan la bixin waxaa lagu qeexayaa xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan waafaqsanna qodobada 37,38 iyo 39 ee Xeerkan.
3. Si loo fududeeyo xisaabta iyo iswaafajinta khasnadda Midaysan, waa in Wasiirku abuuraa xisaab cusub bilowga sannad walba lagu ururinayo dakhliga sannadkaas. 30 maalmood kadib dhammaadka sannadkii hore, dhammaan xisaabihii loo furay sannadkii hore waa in la xiraa, wixii haraa ah oo ku jira xisaabahaas waa in loo wareejiyaa xisaabaha cusub ee loo furay saannadka cusub.

**MADAXA 5-AAD**

**DEYMAHA, DAMMAANAD QAADKA DAWLADDA IYO MAAMULKA DEEQAHA**

**Qodobka 36-aad**

**Deymaha Dawladda**

1. Iyadoo la ilaalinayo xadka awoodeed ee Golaha Wakiilladu ogolaaday xilliga ay ansixin ayaan miisaaniyadda Dawladda ama xilli kaleba sannadka gudihiisa, Wasiirka oo keliya ayaa leh awoodda soo dayn qaadashada si waafaqsan xeer nidaamiyeyaal u gaar ah daymaha oo ka farcamaya Xeerkan. Waxaa ku jira daymaha dalka gudihiisa

iyo dibedaba, sidoo kale deymo la xiriira isticmaal hantida Dawladda iyo kuwo wakhtigoodu gaaban yahay.

2. Wasiirku wuxuu soo saarayaa tilmaamo caddaynaya shuruudaha heshiisyada daymaha.

3. Wasiirku isagoo la tashanaya Bankiga Dawladda ee Puntland, waa in uu soo saaraa tilmaamo gaar ah sida loo qaadan karo daymaha gudaha ee Dawladdu qaadanayso.

4. Waxaa la aasaasaa Guddiga Maamulka Daymaha oo ka kooban Wasiirka oo guddoomiye ah, Guddoomiyaha Bankiga, Wasiirka Caddaalada, Hanti-dhowraha Guud, iyo guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda ee Golaha Wakiillada.

5. Dhammaan heshiisyada daymaha Dawladda waa in ay soo ogolaadaan Guddiga Maamulka Daymaha uuna saxiixaa Wasiirka isagaa ka wakiil ah Dawladda inta aan ka ahayn daymaha gudaha oo uu Bankigu mas'uul ka yahay isagoo la tashanaya Wasiirka.

6. Dhammaan lacagaha ku yimid magaca daymaha waa in lagu xereeyaa Khasnadda Midaysan ee Dawladda inta aan ka ahayn daymaha ay si toos ah dayn bixiyeyaashu ugu shubaan shirkado Dawladdu wax kasoo iibsatay ama shaqo u qabatay iyo daymaha ay soo qaateen shirkada ganacsi ee Dawladdu leedahay iyo hay'adaha kale ee madax bannaan ee aan si toos ah u hoos imaan Dawladda Puntland sida waafaqsan nidaamka xisaabeed ee Dawladda.

## Qodobka 37-aad

## Dammaanadaha Xukuumadda

1. Sida ku cad qodobka 37 farqadiisa (4) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda ee Dawladda Federaalka Soomaaliya, Dawladda Puntland waxay awood u leedahay in ay damaanaq qaad ka samayso dhulka ay ka taliso.

2. Wasiirka ayaa uga wakiil ah Dawladda wixii damaanad qaad ah, daymaha gaarka u ah shirkadaha ganacsi ee Dawladdu leedahay, ama Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee Dawladda in aanay ka badnayn caddadka uu Golaha Wakiilladu u ogolaaday xilligii ansixinta Miisaaniyadda. Dhammaan damaanadaha daymaha waa in ay soo ogolaadaan Guddiga Maamulka Deymaha iyo Wasiirka. Xogta ogolaanshaha damaanadaha waxaa lagu faahfaahin ayaa xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan.

3. Dhammaan heshiisyada ay ku jiraan ballan qaad sababi kara qaan maaliyadeed oo Dawladda ku iman karta ama shirkad ganacsi oo Dawladdu leedahay waa in ay

ogolaadaan Wasiirka iyo Guddiga Maamulka Daymaha. Qaamaha maaliyadeed waxaa ka mid ah:-

b. Damaanad qaad shaqo la qabanayo ama lacag la bixinayo oo qof ama hay'ad sameeyeen.

t. Heshiis kasta ama heshiis ballanqaad inaan waxba la yeelin qof ama hay'ad ama mag dhow loo sameeyo hadii wax ku yimaaddaan, ama ka ilaalin in wax ka lumaan.

j. Ballanqaad kasta oo dhaqaale lagu siinayo hay'ad ama qof oo ay ku jirto faa'iido, lacag ama manaafacaad laga helo maalgashi.

x. Heshiis kasta oo u ballan qaadaya caawinaad dhaqaale qolo kale oo la xiriirta shaqooyin cayiman oo ay qabanayaan qoladaas kale.

Kh. Heshiis kasta oo kale oo lagu sheegay xeer-nidaamiyeyaasha ka farcamaya Xeerkan.

4. Diiwaanka dammaanadaha lagu bixiyey waa in uu hayaa Xisaabiyaha Guud, kuna jirtaa warbixinada sannadlaha ee Sanduuqa Mideysan.
5. Shirkadaha ganacsi iyo kuwa madaxa bannaan ee aan hoos imaanaynin Dawladda Puntland laakiin ay Dawladda Puntland dammaanad u samaysay, waa in ay Dawladda ugu soo celiyaan wixii maaliyad ah qaab iyo xilli uu Wasiirku amray. Waxaa ku jira lacagahaas dhammaan caddadka ay Dawladdu ku bixisay dammaanadaas iyo dhammaan kharashka la xiriira dammaanadaas.
6. Qaabka meel marinta, kormeerida iyo bixinta dammaanadaha waxaa lagu soo saarayaa xeer-nidaamiya ka farcama Xeerkan.

## Qodobka 38-aad

## Haykalka Maareynta Deeqaha iyo Waajibaadka Hay'adaha aan Dawliga ahayn

1. Dhammaan hay'adaha Dawladda waa in ay ka diwaangelinyaan Wasaaradda Maaliyadda dhaqaale kasta oo ay helaan oo aan soo marin nidaamka maaliyadeed ee Dawladda iyo miisaaniyadda, Wasiirku waa in uu soo saaraa qaab lagu ururin ayo xogtaas, lagu kaydiyo, lagu kala saaro loogana warbixin karo.
2. Dhammaan hay'adaha hela deeqaha dibedda loona soo dhex mariyo Miisaaniyadda, waa in ay u soo gudbiyaan Wasaaradda nuqulada heshiisyada dhex maray hay'adda iyo deeq bixiyeyaasha muddo 14 maalmood gudohood.
3. Hay'adaha aan Dawliga ahayn ee fuliya mashaariic mid horumarineed iyo mid bani-addamnimo ee laga maalgeliyo lacagta Dawladda, ayna ku jirto lacagta deeq-

bixiyeyaasha, waxa masu'liyadda lagula xisaabtamayaa Sarkaalka Idman ee Hay'addaas, wuxuuna ku soo gudbin ayaa warbixin-maaliyadeed sannadlaha ee baadhista maray. Xeer-nidaamiye ayaa qeexaya foomamka, asluubta, iyo shuuruudaha aasaasiga ah ee Hay'adaha aan Dawliga ahayn ee laga rabo.

4. Dhammaan heshiisyada deeqaha Hay'adaha Dawladda, kuwa aan Dawliga ahayn iyo hay'adaha ganacsiga ee Dawladda waa in laga diiwan geliyaa Xisaabiyaha Guud si loogu soo daro Xisaab-Xirka sannadka ee Dawladda.

## Qodobka 39-aad
## Warbixinnada Amaahda Wakaaladaha iyo Hay'adaha Dawladda

1. Wakaaladaha/Sharikadaha Dawladdu leedahay iyo Bankiyada Dawladdaba waxay qaadan karaan daymo muddadoodu yar tahay, iyo mid muddada dhexe ah ba oo ay ku iibsadaan hanti ama u isticmaalaan kharashka joogtada ah kadib markay ka helaan ogolaansho cad Guddiga daymaha oo ogolaansho qoraal ah ka samaynaya, Golaha Wakiilladu wuxuu si fiican u eegayaa xadka amaahda uu Wasiirku u ogolaaday Wakaaladahaas /Hay'adahaas xilliga la ansixin ayo Miisaaniyadda sannadka.
2. Wakaaladaha/Sharikadaha Dawladdu leedahay (State- owned enterprise) iyo Bankiyada Dawladda ma u samayn karaan dammaanad amaahda ay ku leeyihiin qandaraasle/shirkado ay wax kasoo iibsadeen hadaan la helin ogolaansho madaxda saree e Hay'adda iyo Guddiga Maamulka Daymaha.
3. Wakaaladaha/Sharikadaha Dawladdu leedahay iyo Bankiyada Dawladda waa in ay iska bixiyaan wixii amaah ah 90 maalmood laga bilaabo taariikhda ay waajibtay dayntaas haddaan la hayn heshiis sheegay xilliyada la bixin ayo daynta. Amaahda bixinteedu dhaafto 90 maalmood waxaa loo aqoonsanayaa dayn waxayna u baahan tahay ogolaansho madaxda sare ee Wakaaladaas, iyo Guddiga Daymaha.
4. Wakaaladaha/Sharikadaha Dawladdu leedahay iyo Bankiyada Dawladda waa in ay ka doontaan ogolaansho madaxdooda sare iyo in aysan Guddiga Maamulka Daymaha waxba ka qabin qorshohooda daymaha bilowga sannad maaliyadeedka, sidoo kale hadday qorsheynayaan dib u habayn daymihii hore oo lagu muujin ayo qorshohooda kharash ee sannadkaas.
5. Wakaaladaha/Sharikadaha Dawladdu leedahay iyo Bankiyada Dawladda waa in ay u gudbiyaan guddiga daymaha 3dii biloodba warbixin faahfaahsan ee daymaha ay qabaan oo ay ku jiraan daymaha ay Dawladdu dammaanad qaaday, daymaha ay bixintooda dib u habayn ku sameeyeen, amaahda ay kasoo qaateen qandaraaslayaasha

ama shirkado ay wax ka iibsadeen oo dhaafay 90kii cisho, sida ay u bixin ayaan ama u bixiyeen.

6. Waajibaadka daymaha, daymaha dib u habayn lagu sameeyey, iyo warbixinnada daymaha ee Wakaaladaha iyo Bankiyada Dawladda waxaa lagu sii faahfaahin ayaa xeer-nidaamiye kasii farcamaya Xeerkan.

## Qodobka 40-aad

## Diiwaangelinta iyo Warbixinta Daymaha Dawladda

1. Guddigu wuxuu diwaangelin ayaa dhammaan daymaha Dawladda oo ay ku jiraan dammaanadaha, Diiwaannada iyo magacyada dadka/shirkadaha daymaha ku leh Dawladda waxaa haynaya Bankiga Dawaldda ee Puntland.
2. Amaahda ururtay ee ay leeyihiin qandaraaslayda/shirkadaha ee dhaafay xilligii bixinta welina ku taagan Dawladda sannadka dhamaadkiisa, waxaa loo tixgelin ayaa loona diiwaan gelin ayaa dayn ahaan, qorshaha bixinteeda waxaa lagu darayaa warbixinta
3. Guddigu wuxuu sanadkiiba laba jeer, diyaarin ayaa una gudbin ayaa warbixin Madaxweynaha iyo Golaha Wakiiladda xogaha daymaha cusub ee loo baahan yahay, qorshaha bixinta daymaha, daymaha u baahan in bixintooda dib u habayn lagu sameeyo, daymaha aan loo baahnayn in la bixiyo oo la tirtirayo iyo kuwa wakhtigoodii dhammaday. Guddigu wuxuu diyaarin ayaa soona daabacayaa daymaha ku taagan Dawladda iyo qorshaha bixintooda ee muddada dhexe.
4. Dhammaan daymaha, hantida maaliyadeed ama qaamaha maaliyadeed waa in uu diiwaan geliyaa Xisaabiyaha Guud lagana warbixiyaa sannad walba iyagoo qayb ka ah Xisaab-Xirka Dawladda ee waafaqsan nidaamka xisaabaadka ee uu Xeerkan tilmaamayo.
5. Waa in Wasiirku hubiyaa in ay jirto nidaam loo dejiyey daymaha oo casriyeyn lagu sameeyo mar walba laguna daabacayo warbixinada kala duwan, shuruudaha kala duwan ee daymaha iyo dammaanadaha kala duwan ee ay Dawladdu samayso.

## MADAXA 6-AAD

## MAAMULKA LACAGTA NAQADIGA AH IYO HABEYNTA BANKIYADA

## Qodobka 41-aad

## Maamulka Lacagta Naqdiga ah

1. Xisaabiyaha Guud ayaa mas'uul ka ah hubinta, in si taxadar leh, sida ugu dhaqaalaha badan uguna kharash yar ay Dawladdu u isticmaasho lacagta Dawladda.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

2. Waa in Xisaabiyaha Guud uu hayo lacag ku filan dhammaan kharashaadka soo maray nidaamka kharash bixinta waafaqsan Miisaaniyadda.
3. Waa in xeer-nidaamiye ka farcama Xeerkan laga soo saaraa sida ugu wanaagsan ee Dawladdu u isticmaalayso lacagta, Xeer-Nidaamiyaha waa in uu:-
   b. Awood siiyaa in Wasiirku uu ka dalban karo dhammaan hay'adaha Dawladda macluumaadka la xiriira isticmaalka iyo maamulka lacagta
   t. Amro Wasiirku in uu sameeyo qaabka maamul ee lacagta ee laga doonayo in Hay'ad walba ku dhaqanto
   j. Siiyo Wasiirka awood uu ku heli karo macluumaadka xisaabaadka u furan hay'adaha Dawladda oo dhan.
   x. U ogolaado in Wasiirku la socodsiiyo Bankiga Dawladda qorshaha amaah lacageed oo dabooli karta baahida lacageed. Wasiirka iyo Bankigu waa in ay ka wada shaqeeyaan maamulo lacagaha sannadka dhexdiisa.

## Qodobka 42-aad

## Habeynta Bankiyada

1. Nidaamka Bankiyada ee Dawladda waa in ay ku shaqeeyaan mabaa'diida Khasnadda Midaysan taasoo ujeedadu tahay in xisaabaha Dawladda Puntland oo dhan ay la mideeyo.
2. Hay'adaha Dawladda looma furi karo Xisaab Banki, ha ahaato mid dalka gudihiisa ama dibeddiisa ah, iyada oo aan ogollaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
3. Xisaabta guud ee Dawladda waxaa laga furayaa (xarunta dhexe) ee Bankiga Dawladda Puntland, kaasoo dhammaan dakhliga lagu xeraynayo, kharashkana laga bixin ayo.
4. Xisaabiyaha Guud isagoo la tashanaya Bankiga Dawladda wuxuu ogolaan karaa furista xisaabo laga furo Bankiga Dawladda Puntland iyo Bunuugta gaarka loo leeyahay ee dalka gudihiisa iyo dibediisaba kuwaasoo u sahlaya Dawladda in ay usoo maraan lacagaha lagana bixiyo wixii lacag bixin ah ee loo baahdo, Macluumaadka maamulka bunuugtan waxaa lagu soo saarayaa xeernidaamiye ka farcama Xeerkan.
5. Habraacyo lagu furayo, xirayo ama looga shaqaynayo xisaabaadka Bankiga Dawladda waxaa lagu soo saarayaa xeer-nidaamiye ka farcama Xeerkan. Wasiirku wuxuu kaloo soo saarayaa awaamir iyo hagayaal lagu maamulo xisaabaadka Bankiga

## MADAXA 7-AAD

## XISAABAADKA IYO WARBIXINADA

### Qodobka 43-aad

### Xisaabaadka

1. Dawladdu waa in ay u hoggaanstaa halbeegyada Xisaabaadka & Hantidhawrka ee lagu taliyey ama ay soo saareen hay'adda sharciyeynta ee Soomaaliya
2. Halbeegyada xisaabaadka waa in loo isticmaalaa dhammaan xisaabaadka heer walba ee Dawladda sida ku xusan Xeerkan iyadoo la tixgelin ayo si joogto ah habraacyada ay isku waafaqeen Dawladda Puntland iyo Dawladda Federaalka. Shirkadaha ay Dawladdu leedahay waa in ay waafaqsan yihiin Halbeegyada xisaabaadka ee Dawladduhu isku raacaan.
3. Diiwaanada xisaabaadka waxaa la isticmaalayaa nidaamka lacagta, diiwaan gelinta dhammaan dakhliga iyo kharashka ee Dawladda, waxaa loo kala saarsaarayaa madaxyada shaxda xisaabaadka ee la isla qaatay waana in uu waafaqsan yahay mabda'a loo yaqaan xeraynta labada dhinac.
4. Diiwaanka xisaabaadka Dawladda Puntland waa in lagu kaydiyaa Aaladda elektaroonigga ee Nidaamka Maaraynta Maaliyadda isku-dhafan.
5. Waa in la diiwaan geliyaa hantida maaliyadeed, kuwa sugan iyo kuwa aan sugnayn, qaanta/amaahda/daymaha lagu leeyahay Dawladda heer degmo, gobol, wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee Dawladda.
6. Diiwaannada xisaabaadka oo dhan waa in la kaydiyaa 7 sannadood. Haddii ay diiwaannadu ahaayeen elektaroonic waa in ay jiraan nuqullo gacanta lagu hayo si hadday qeyb la waayo loo soo ceshan karo xogta. Nidaamka xisaabaadka ee waa in la ilaaliyaa, la dayactiraa si wixii xog ah loo heli karo muddo 7 sano ah.
7. Halbeegyada Xisaabaadka ee Dawladda Puntland waa in uu waafaqsanaadaa nidaamka lacagta caddaanka ah ee ay amreen ururada loo xilsaaray soo saarista halbeegyada Xisaabaadka ee Dawladda. Iyadoo ay amar tahay in la raaco halbeegyadaas, Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee Dawladda waxay kaloo ka warbixin ayaan hantida lacageed, daymaha lacageed iyo daymaha lacageed oo qaantoodu ku xiran tahay dhacdo kale.
8. Wasiirku isagoo la tashanaya Hantidhawraha Guud waa in ay soo saaraan xeerarka xisaabaadka ee laga rabo in ay Dawladdu u isticmaasho xisabaadka. Waxaa lagu soo

saarayaa xeer-nidaamiye u gaar ah oo ka farcamaya Xeerkan iyo habraacyo iyo tilmaamo kale oo uu Wasiirku soo saaro.

9. Xeerarka xisaabaadka waa in lagu xusaa habraacyo gaar u ah hantida dalka kusoo gasha deeq ahaan oo aan soo marin nidaamka maaliyadeed ee Dawladda.
10. Wasiirka isagoo la tashanaya Xisaabiyaha Guud waa in ay soo saaraan shaxda xisaabaadka oo waafaqsan qaabka qoondada Miisaaniyadda loo kala saarsaaray sida Xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisu sheegayaan.
11. Wasiirku waa in uu aasaasaa xarun dhexe ee xisaabaadka taasoo shaqooyinkeeda lagu qeexi doono xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan. Madaxan ama xaruntan waxay hoos imaanaysaa Xisaabiyaha Guud.
12. Wasiir iyo madax walba ee hay'ad miisaaniyad leh waxay mas'uul ka yihiin iyagoo raacaya amarka Wasiirka in ay ka dhex asaasaan Wasaaradooda ama Haya'adooda, qayb qaabilsan xisaabaadka, sida ay farayaan xeernidaamiyeyaasha, tilaamamaha iyo habraacyada ka farcama Xeerkan.
13. Wasiir iyo madax kasta ee Hay'ad Dawladeed oo leh qoondo maaliyadeed ayaa mas'uul ka ah ilaalinta kaydka dukumintiyada xisaabeed iyo xafidaadooda haday yihiin waraaqo iyo elektaroonik la xiriira dhacdooyinka maaliyadeed qaabka iyo xilliga lagu sheegay xeer-nidaamiyeyaasha iyo Xeerkanba.

## Qodobka 44-aad

## Warbixinnada Xisaabaadka

1. Waa mas'uuliyad guud ee Xeerkanu farayo dhammaan saraakiisha Dawladda ee gacanta ku haya xisaabaadka maaliyadda in warbixinada xisaabaadka/maaliyadda ay u gudbiyaan si deg deg ah, waxba aysan ka maqnayn, wax khalad ahna aysan ku jirin sida Xeerkan ku qoran iyo xeernidaamiyeyaasha ka farcama iyo tilmaamayaasha kale ee Wasiirku soo saaro.
2. Haya'ad walba oo leh qoondo miisaaniyadeed waxaa laga rabaa in ay u gudbiyaan Wasiirka warbixin ku saabsan dakhliga bil walba iyo kharashka 3dii bilood oo loo barbardhigay qoondadii Miisaaniyadda ee xilligaas, iyadoo la raacayo wakhtiga iyo qaabka lagu sheegay xeer-nidaamiyeyaasha Xeerkan ka farcamay.
3. Dhammaan hay'adaha leh qoondo kharash waa in ay u gudbiyaan Wasiirka 3dii biloodba, xisaab-xirrada Wasaaraddaas/hay'addaas oo ka kooban, warbixinta qulqulka lacagta caddaanka ah, warbixinta dakhliga iyo kharashka ee khasnadda midaysan, iyo warbixinta hantida iyo qaamaha ee dhammadka 3daas bilood iyo wixii

kale oo faahfaahin ah oo lagu sheegi doono xeernidaamiyeyaasha ka farcamaya Xeerkan.

4. Iyadoo la raacayo xogta laga helay hay'adaha leh qoondada miisaaniyad, Wasiirku waa in uu soo saaraa warbixin isu geynaysa dhammaan warbixinadaas 3 biloodka ah, isuna barbardhigaysa, sida kharashka loo fuliyay, dakhliga loo ururiyay iyo qiyaastii Miisaaniyadda Dawladda, Warbixintaas waa in loo gudbiyaa Madaxweynaha, Golaha Wakiillada iyo Muwaadiniinta muddo aan ka badnayn 45 maalmood kadib dhamaadka 3da bilood ee warbixintu ku saabsan tahay. Qaabka warbixinta 3 biloodka waxaa lagu sheegayaa xeernidaaamiyeyaasha ka farcama Xeerkan.

## Qodobka 45-aad

## Warbixinnada Sannadka Gudihiisa

1. Sarkaal Idman oo kasta ee Hay'adaha Dawladda waa in uu warbixin bille ah oo ku saabsan dakhliga iyo Kharashka u soo gudbiyaa Xisaabiyaha Guud muddo toddoba maalmo-shaqo gudahood, marka bishu dhammaato iyadoo la raacayo qaabka uu caddeeyey Xisaabiyaha Guud.
2. Sarkaal Idman oo kasta ee Hay'adaha Dawladda waa in uu warbixin 3 biloodle ah u soo gudbiyo Xisaabiyaha Guud, xisaabaadka Hay'adaha Dawladda oo ay ka mid yihiin Warbixin Xisaabeedka qulqulka lacagta cadaanka ah, kashfiga xisaabta dakhliga iyo Kharashka ee Sanduuqa Mideysan ee Warqadda Miisaanka oo ay ku lifaaqan tahay kuna caddahay raasumaalka iyo daymaha lagu leeyahay dhammaadka rubuclaha, iyo wixii tafaasiil kale ee uu amro in lagu dhaqmo Xisaabiyaha Guud.

## Qodobka 46-aad

## Warbixin Maaliyadeed ee Sannadle iyo Baadhitaanka Dibedda

1. Warbixin-Maaliyadeed ee Sannadka waa in la diyaariyaa si waafaqsan xeerarka xisaabaadka ee Dawladdu qaadatay, Warbixin-Maaliyadeedka Sannadka ee Dawladda Puntland waxay isu gaynaysaa dhammaan warbixinnada hay'adaha Dawladda sida ku qeexan Xeerkan, Warbixin-Maaliyadeedkan waxaa kamid ah:
   b. Xaashida dheelitirka oo ay ku lifaaqan tahay kuna caddahay raasumaalka iyo daymaha lagu leeyahay
   t. Qulqulka lacagta naqdiga ah oo muujin aysa, dakhliga iyo kharashka iyadoo si kooban gaar loogu muujin ayo dakhliga iyo kharashka hawl socodsiinta,

kharashka lagu soo iibsado hantida maguurtada ah iyo

j. Is barbar-dhigga Miisaaniyadda Dawladda nuqulkii hore, nuqulkii dib loogu nooqday ee lagu saaray kabka miisaaniyadda iyo kala wareejinnada iyo sida ay wax u dheceen.

x. Warbixinta hantida iyo daymaha oo loo kala saarsaaray qaab fududaynaya fahamka hantida iyo deymaha.

kh. Warbixinta habraacyada iyo siyaasadaha xisabaadka.

d. Warbixin sii faahfaahin aysa xisaabaadka meelaha lasoo koobay iyo deeqaha soo gala Puntland meelaha ay ka kala yimaadeen

2. Xisaabiyaha Guud waa in uu diyaariyo Warbixin Sannad-Maaliyadeed ee aan baaris marin, una gudbiyo Hanti Dhowraha Guud muddo aan afar bilood ka badnayn ka dib dhammaadka sannad maaliyadeedkaas. Warbixin Maaliyadeedka Sannadka ee aan la baarin waa in lagu daabacaa mareegta Wasaaradda Maaliyadda 4 bilood kadib dhammaadka sannadka si shacabku ula socdaan.

3. Hay'adaha Dawladda iyo Hay'adaha qoondo ku leh miisaaniyadda waa in ay diyaariyaan una gudbiyaan Xisaabiyaha Guud iyo Wasiirka Warbixin Sannad Maaliyadeed si ay ugu daraan warbixinta guud ee Dawladda, Dhammaan hay'aduhu waa in ay kharashkooda ku daraan khidmadda Hantidhawrka ee baarista loogu sameeyey. Qiimaha baarista ee Hantidahwrka waxaa jaangoynaya Golaha Wakiillada isagoo la tashanaya Hantidhawraha Guud xilliga la diyaarin ayo miisaaniyadda Xafiiska Hantidhawrka Guud.

4. Xisaabaadka Xafiiska Hantidhawraha Guud waa in ay baaris ku sameeyaan, ugu yaraan hal mar Sannad Maliyadeedka, shirkad sumcad leh xirfaddooduna tahay Hantidhawrnimo, taas oo ay soo dirayaan Golaha Wakiillada iyagoo kula heshiin aya xadka shaqada iyo qiimaha ay ku qabanayaan. Khidmaadda shirkaddan waxaa laga bixin ayaa miisaaniyadda Xafiiska Hantidhawrka Guud. 5. Hanti Dhowraha Guud waa in uu baaris ku sameeyo Warbixin Sannad Maaliyadeedka una gudbiyaa Golaha Wakiillada Warbixinta Baarista oo ay ku lifaaqan tahay Warbixin Sannad-Maaliyadeedka, waana in aanay laba bilood dib uga dhicin marka laga soo bilaabo markii uu helay Warbixin SannadMaaliyadeed ka ee aan baarista soo marin. Warbixinta Hantidhawrka waa in ay ka muuqataa jawaabaha iyo sababynta Wasiirka waxyaabaha uu Hantidhawruhu ka soo qoray Warbixin-Maaliyadeedka ay soo gudbiyeen Wasaaradda Maaliyadda.

6. Hanti Dhowraha Guud waa in uu ku faafiyo warbixinta baarista faafinta rasmiga ah si caam ahna loogu bandhigo Dadweynaha hal bil ka dib marka uu Warbixintiisa u gudbiyo Golaha Wakiillada sida ku cad Xeerka Hanti Dhowrka Guud qodobka 13aad farqadda 1aad iyo 2aad.
7. Marka uu Hanti Dhowraha Guud u gudbiyo warbixintiisa Golaha Wakiillada sida ku xusan Xeerkan, waa in uu Xisaabiyaha Guud isna faafiyo warbixinta baadhista Warbixin-Maaliyadeed Sannadlaha ah.

## MADAXA 8-AAD

## Hantidhawrka Gudaha

### Qodobka 47-aad

### Hantidhawrka Gudaha

1. Ujeedada ugu weyn ee qaybta Hantidhawrka Gudaha waa in ay hormariso, ilaalisana waxtarka Hay'adaha Dawladda, iyagoo u qabanaya xaqiijin madax bannaan, talo, iyo aqoon ka caawin aysa gudashada waajibaadkooda sharci iyo mid maaliyadeed taas oo u samaynaysa qiimayn madax bannaan oo nidaamsan oo lagu eegayo in maamulka khataraha, kantaroollada iyo habraacyada maamul ay u shaqaynayaan sidii loogu talo galay.
2. Hay'ad kasta oo Dawladeedwaa in qaab dhismeedkeedu ku jiraa qayb qaabilsan Hantidhawrka Gudaha si waafaqsan nidaamka Shaqada iyo Shaqaalaha Dawladda.
3. Madaxa Hantidhawrka Gudaha waa in ay ka madax bannaan tahay shaqooyinka kale ee la baaro, waxay awood u leeyihiin in ay helaan macluumaad kasta oo ay u baahdaan, gelina karaan xafiis walba, lana kulmi karaan sarkaal walba oo shaqo uga xiran tahay iyagoo gudanaya waajibaadka loo xilsaaray.
4. Saraakiisha idman waa in ay xaqiijiyaan in Madaxa Hantidhawrka Gudaha ay u dhamaystiran yihiin agabka iyo wixii kale ee ay u baahan yihiin si ay u fuliyaan shaqooyinkooda.
5. Hantidhawrka Gudaha ee Hay'ad walba waa in uu ka mid noqdaa maamulka sare ee Hay'adaas.
6. Hantidhawrka Gudaha shaqo ahaan wuxuu hoos tagaa Guddoomiyaha Hay'adda.
7. Hantidhawraha Gudaha ee Dawladda waa in uu:-
   b. Qiimeeyaa qaabka loo maamulo xisaabaadka, koontaroolka mas'uuliyadaha iyo hawl fulinta hay'adaas.

t. Qiimeeyaa waxtarka Talana ku darsadaan horumarinta habraacyada maamulka khataraha ee hay'adaas.

j. Ka warbixiyaa waxtarka iyo hufnaanta ee dhaqaalaha barnaamijyada ka socda hay'adaas.

x. U sameeyaa talo soo jeedin ku saabsan sida loo xallin ayo cilladaha jira Wasiirka hay'adaas ama madaxda hay'adaha madaxa bannaan ogaysiiyaana Wasiirka

8. Inta uu hantidhawruhu ku guda jiro waajibaadkiisa, wuxuu leeyahay awood aan xad lahayn uu ku helayo macluumaadka iyo hantida uu baarayo waana in la siiyaa wixii sharraxaad ah oo uu baahdo.
9. Xafiiska Hantidhawrka Gudaha waa in uu diyaariyaa qorshaha shaqo ee xafiiska ee sannadka taasoo lagu salaynayo khataraha maaliyadeed ee hay'adaas.
10. Hantidhawrka Gudahu wuxuu warbixinta baadhisaha u gudbin ayaa Masuulka Hay'adda ugu sareeya 3 sadexdii biloodba mar.
11. Hantidhawraha Guud waa in uu helaa nuqullo dhammaan warbixinnada ay diyaariyeen Hantidhawrayaasha Gudaha jooga hay'adaha Dawladda.
12. Faahfaahin dheeraad ah ee dhanka shaqada, baaxadda shaqada oo faahfaahsan, mas'uuliyadda warbixinada, shaqooyinka Hantidhawrayaasha Gudaha, waa in lagu sii qeexaa xeer-nidaamiyeyaal ka farcamaya Xeerkan oo ay weheliyaan tilmaamo iyo amaro uu soo saaro Wasiirka.

## MADAXA 9-AAD

## WAKAALADAHA / SHARIKADAHA EE DAWLADDA IYO SANDUUKHYADA GAARKA AH

### Qodobka 48-aad

### Maaraynta Maamulka Maaliyadda Guud

1. Wakaaladaha iyo Sanduukhyada Gaarka ah ee hoos yimaadda Dawladda Puntland waa in ay ku dhaqmaan nidaamka maamulka maaliyadeed iyo sannad maaliyadeedka Dawladda
2. Wakaaladaha iyo Sanduukhyada Gaarka ah waa in loo diiwaan geliyo dhammaan xisaabaadka Wakaaladdaas ama Sanduukhaas sida uu qabo habaraacyada iyo xeer nidaamiyeyaasha Xeerkan farayaan.

3. Wakaaladaha, shirkadaha iyo Sanduukhyada Gaarka ah waa in ay xisaab-xirka sannadlaha ah u gudbiyaan Xisaabiyaha Guud, Wasiirka iyo Hantidhawraha Guud laba bilood kadib dhammaadka sannad maaliyadeedka.

## Qodobka 49-aad

## Soo Gudbinta Dhamaystirka Miisaaniyadda ee Wakaaladaha iyo Sanduukhyada Gaarka ah

1. Wakaalad walba iyo Sanduukh Gaar ah oo walba waa in ay u gudbiyaan Wasaaradda Maaliyadda ugu yaraan afar (4) bilood ka hor bilowga Sannad Maaliyadeedka Dawladda:
   b. Miisaaniyadda ay codsanayaan oo loo diyaariyay qaabka ay Wasaaraddu soo jeedisay,Wasiirku waa in uu qiimeeyaa Miisaaniyadda la soo gudbiyey lana socodsiiyaa Madaxweynaha iyo Golaha Wakiillada.
   t. Warbixin sheegaysa deeqaha la filayo sannad maaliyadeedka, ilaha ay ka imanayaan iyo ujeedadooda.
   j. Warbixin sheegaysa daymaha ku taagan oo ay ku jiraan daymaha shirkadaha wax laga soo iibsaday.
2. Waa in Wasiirku ogaysiiyaa Wakaalad walba iyo Sanduukhyada Gaarka ah go'aanka ugu danbeeya ee codsigoodii Miisaaniyadda xilliga laga wada hadlayo qoondada Miisaaniyadda, kana codsadaan in ay ku noqdaan oo ay soo gudbiyaan qiyaas cusub oo waafaqsan inta la isku raacay.

## Qodobka 50-aad

## Warbixinta Sannadka Gudihiisa iyo Warbixin Maaliyaddedka ee Wakaaladaha/Sharikadaha Dawladda

1. Wakaaladaha/Sharikadaha ee Dawladda waa in ay soddon (30) maalmood gudahood ka dib dhammaadka saddexdii bilood kasta u soo gudbiyaan Warbixin Maaliyadeedkooda Xisaabiyaha Guud iyada oo la raacayo qaabka uu tilmaamay xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada kale ee uu Wasiirku soo saaray sida ku cad Xeerkan. Warbixin Maaliyadeedkan waa in ay isu barbardhigtaa dakhliga iyo kharashka lagu qoondeeyey Miisaaniyadda sannadka ee la ansixiyey.
2. Inta aan ka ahayn Xafiiska Hantidhawrka Guud, Wakaaladaha/Shirkadaha Dawladda ee kasta waa in ay diyaariyaan sannad walba xisaab-xir waafaqsan shuruucda

xisaabaadka laba (2) bilood kadib dhammaadka sannad maaliyadeedka una gudbiyaan Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawrka Guud.

Xafiiska Hantidhawrka Guud waa in uu diyaariyaa una gudbiyaa xisaab-xirkiisa Golaha Wakiillada iyo Madaxweynaha isla xilligaas loo qabtay Wakaaladaha iyo Sharikadaha Dawladda qodobkan ku xusan. Qaabka loo diyaarin ayo xisaabxirkaas waxaa lagu qeexayaa xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan.

## Qodobka 51-aad

## Lacagta Dheeriga ku ah Wakaaladaha iyo Sharikadaha Dawladda

1. Iyadoo la xiganayo Xeerka lagu aasaasay Wakaaladda ama Shirkadda, Wasiirka oo la tashanaya Madaxda sare in ay amraan Wakaaladda ama Shirkadda ay Dawladda usoo gudbiyaan wixii lacag ah oo u soo xerooday dheerina ka ah baahidooda sannadkaas.
2. Lacagtaas ay soo gudbiyaan Wakaaladaha iyo Shirkadaha waxaa lagu darayaa dakhliga Dawladda ee sannadkaas.

## MADAXA 10-AAD

## QODOBO GAAR U AH WAKAALADAHA / SHARIKADAHA EE DAWLADDA

## Qodobka 52-aad

## Xadka iyo Awoodaha

1. Waa in Dawladdu diyaarisaa oo dhaqan gelisaa qaab ay ugu kala soocayso hay'adaha Dawladda mas'uuliyadaha la xiriira maamulka, diyaarinta siyaasadaha iyo korjoogtaynta Wakaaladaha/Shirkadaha Dawladdu Leedahay
2. Awoodaha, shaqooyinka, hawl-fulinta iyo warbixinnada laga doonayo Shirkadaha Dawladdu leedahay waa in ay hagaan Shuruucda lagu aasaasay

   Wakaaladaas ama Shirkaddaas, Xeerka sheegaya hay'adaha kor-joogtaynaya Wakaaladaha iyo Shirkadaha oo isbedel lagu samayn karo markii loo baahdo, iyo xeer kasta ama Xeer Nidaamiye kasta oo la xiriira hawshan.
3. Wakaaladaha iyo Shirkadaha waa in ay xisaabaadkooda u diyaariyaan qaabka loo diyaariyo Shirkadaha faa'iido doonka ah ee warbixinnada Xisabaadka waa in ay waafaqsan yihiin Xeerarka Xisaabaadka ee ay soo saareen hay'adda u qaabilsan dalka soo saarista xeerarka xisaabaadka.
4. Iyadoo aan la xadidayn faracyadan kore, faracan iyo qodobada ka hadlaya awoodaha daymaha, dammaanaha, warbixinnada daymaha ayaa mudnaanta ka leh shuruucda iyo xeerarka kale xilli walba, dhammaam Wakaaladaha iyo Shirkadaha Dawladdu leedahayna waa in ay u hogaansamaan.

## Qodobka 53-aad

## Qorshaha Maaliyadeed ee Wakaaladaha iyo Shirkadaha Dawladdu Leedahay

1. Qorshaha fog iyo qorshaha sannad maaliyadeedka ee Wakaalad iyo Shirkad kasta waa in ay ansixiyaan madaxda sare, nuqul kamid ahna loo gudbiyaa Wasiirka.
2. Wasiirka ayaa soo saarayaa qaabka loo diyaarinayo qorshaha maaliyadeed.

## Qodobka 54-aad

## Warbixinada Sannadka Dhexdiisa ah iyo Warbixinnada Sannadlaha ah ee Wakaaladaha iyo Shirkadaha Dawladdu Leedahay

1. Wakaalad/Shirkad Dawladdu leedahay waa in ay bil gudaheed kadib dhamaadka 3 biloodkii hore usoo gudbiyaan Wasiirka warbixin maaliyadeed 3 biloodkii dhamaaday. Sidoo kale, nidaamka xisaab-xirrada iyo warbixinada laga rabo Wakaaladaha iyo Shirkadaha Dawladdu leedahay waa in lagu qeexaa xeernidaamiyeyaal ka farcamaya Xeerkan. Wakaalad walba iyo Shirkad kasta oo Dawladdu leedahay waxay u diyaarin ayaan xisaabaadkooda iyo warbixin maaliyadeed kooda si waafaqsan xeerarka xisaabaadka ee Dawladda.
2. Wakaaladadaha iyo Shirkadaha Dawladdu leedahay waxay diyaarin ayaan una gudbin ayaan Wasiirka, Hantidhawraha Guud iyo Xafiisyada laga maamulo Wakaaladaha iyo Shirkadaha warbixin maaliyadeedka sannadle ah muddo aan ka badnayn 2 bilood kadib dhammaadka sannadka ay ku shaqeeyaan. Hantidhawraha Guud wuxuu baarayaa xisaabaadka una gudbin ayaa Golaha Wakiillada warbixinta Hantidhawka ee warbixin maaliyadeedka Dawladda ee loo soo gudbiyey iyo fekerkiisa ku aaddan fulinta miisaaniyadda Dawladda.
3. Wasiirku wuxuu ka hor akhrin ayaa Golaha Wakiillada guud ahaan qaabkii Wakaaladuhu ama Shirkaduhu u maamuleen miisaaniyadda iyo dhammaan arrimaha maaliyadda ee sannadkii la soo dhaafay.

## Qodobka 55-aad

## Siyaasadda Faa'iida Qaybsiga

1. Madaxda sare ayaa mas'uul ka ah Siyaasadda Guud ee Faa'iido Qaybsiga, waana in ay hubiyaan in siyaasaddaas u hogaansameen, tixgeliyeenna maamulka Wakaaladdaha

iyo Shirkaddaha Dawladdu wax ku leedahay, iyagoo aad uga taxadaraya xaaladda dhaqaale ee Wakaaladda iyo Shirkadda.

2. Faa'iidada laga filayo Wakaaladdaha iyo Shirkaddaha Dawladdu wax ku leedahay waa in lagu muujiyaa miisaaniyadda loo gudbin ayo Golaha Wakiillada.
3. Haddii Shirkad ay Dawladdu wax ku leedahay samayso faa'iido aad u badan, waa in madaxdeedu ogaysiisaa Wasiirka kana codsataa ogolaansho hadday damcaan in la bixiyo faa'iido ka badan intii hore la filayey iyagoo wakiil ka ah Dawladda.
4. Dhammaan faa'iidooyinka waa in lagu shubaa/xereeyaa Khasnadda Dawladda.
5. Faa'iidada la bixiyo ma yarayn karto cashuurta Dawladdu ku leedahay Shirkadda Dawladdu wax ku leedahay.

## MADAXA 11-AAD

## HANTIDA DANTA GUUD

### Qodobka 56-aad

### Danta Guud

1. Ma jiro qof (shakhsi ama cid shakhsiyad qaanuun leh) ku yeelan kara Hantida Danta Guud ee Dawladda, qoraal iyo xeer sidaa oo kale ma jiro qof bixin kara.
2. Hantida Dawladda waxaa maamulaya Wasiirka isagoo wakiil ka ah Dawladda Puntland.
3. Haddii aan lagu sheegin xeer, Hay'ad walba waxay mas'uul ka tahay hantida loo xilsaaray in ay ku qabato shaqooyinka Dawladda.
4. Wasiirku waa in uu diiwaan geliyaa dhammaan hantida maguurtada ah ee Dawladda.
5. Xisaabiye kasta ee jooga hay'adaha Dawladda wuxuu masuul ka yahay hantida Dawladda ee uu u xilsaaran yahay.

### Qodobka 57-aad

### Hantida Kale ee Dawladda

Hantida soo socota, waxaa iyana iska leh Dawladda:-

1. Hanti maguurto ah oo cid lihi jirin
2. Khayraadka dalku leeyahay
3. Xerooyinka Ciidamada iyo Kaydka hubka
4. Dhismayaasha Dawladda iyo hantida dhextaalla ee ay leedahay una isticmaasho fulinta adeegyada,
5. Hanti kasta ama lahaanshaheeda ay Dawladdu ku yeelatay sida sharcigu qabo, dhaxashay ama la wareegtay, hadiyad ahaan loo siiyey, iib ama wareejin.

## MADAXA 12-AAD

## Xayiraadaha

### Qodobka 58-aad

### Masuuliyad-Maaliyadeedka Shakhsiga ah ee Sarkaalka Idman

1. Xadgudub kasta ee Xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa waxay keenaysaa ciqaab sida ku xusan xeeraka maamul iyo xeerarka denbiyada.
2. Nooca Ciqaab ee xadgudubka Xeerkan in uu noqdo ciqaab maamul ama mid denbi waxay ku xirnaanaysaa denbiga ama khaladka la galay in uu yahay, sharci jebin, khalad yar oo dhacay ama dembi weyn.

### Qodobka 59-aad
### Soo-celinta Lacagta kharash bixin si Khalad ah ku Baxday

1. Sarkaalka idman ee kasta oo Hay'ad Dawladeed waxa laga rabaa in uu diiwaan geliyey oo hayo lacagta habka qaldan ku baxday sida ay qabaan Xeernidaamiyeyaashu.
2. Sarkaalka idman ee Hay'ad kasta ee Dawladda waa in uu qaado tallaabooyinka ku haboon ee dib loogu soo celinaayo dhammaan lacagihii ay lahayd Dawladdu oo qandaraasluhu si khaldan u qaatay isaga oo aan gudan ama aan dhammaystirin waajibaadkiisii shaqo iyo hawshii lagula heshiiyey ama si khaldan ku qaatay lacag dheeraad ah.
3. Haddii qofku yahay mid aan bixin deyn aan cashuur ahayn oo Dawladdu ku leedahay;
   b. Qofkaas waa laga joojin ayaa in wax laga iibiyo mudo aan saddex sano ka badnayn si waafaqsan Xeerka Iibka Dawladda.
   t. Sarkaalka Idman wuxu samayn karaa in uu deymaha taagan ku wargeliyo Xafiisyada soo-celinta qaamaha u qaabilsan Dawladda, wuxuu sidaas oo kale ku dalaci karaa khidmada adeega iyo ganaaxyada dul fuulay deynta, iyo heshiiskii lala galay kuwa qaamaha deynta ee gaarka loo leeyahay.
   j. Hay'adda Dawladda arrinku khuseeyo waxa ay laali kartaa ama kala noqon kartaa shatigii iyo fasaxii shaqo si waafaqsan Xeerkan

### Qodobka 60-aad
### Dembiyada iyo Ciqaabaadka

Ku xad gudubka Xeerkan ama xeer-nidaamayaasha ka farcama ama la xiriira, waxaa lagu muteysanayaa ciqaab waafaqsan Xeerka Maamulka iyo Xeer Ciqaabaadka Puntland.

STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 61-aad
## Cadeymaha Diwaangelinta Danabaysan

1. Oggolaanshaha macluumaad kasta ee ku saabsan Maareynta Maaliyadda Danabaysan ee lagu macaamilo oo laga dhex helo Nidaamka Maaraynta Maaliyadeed ee Dawladda, haddiiba loo soo bandhigo habka dukumintiyada, ama kombiyuutar lagu daabaco, ama la keeno nuqul warqad ku daabacan, lagu sawiray film-yaraha ama lagu kaydiyey floppy ama hard disc, ama la adeegsado qaab kasta oo kale ee warbaahinta elktrooniga ah, macluumaadkaas oo dhan waa in caddaymaha laga aqbali karaa Maxkamad kasta horteeda ee macaamilka Maaliyadda ay u aragto in ay la xiriirta.
2. Sawirro muuqaal leh sida filim, filim-yare, microfiche ama muuqaalada kombiyuutarka ee dukuminti ama waraaqo asal ah sida jeegag, xawilaadda lacagta elktroonig ah, ama aalad kasta oo lacag lagu bixin karo ama daftarka/diiwanka xisaabaha, waxa loo aqbalayaa sidii caddaynta asalka ee loo daliishan karo lana xirriirta arrin ama macaamilka maaraynta maaliyadda, sidii oo ay tahay caddayn sugan oo markhaati la dhaariyey leh.
3. Tilmaamaha kharash-bixinta, farriimaha iyo wareejinada lacagaha la bixiyey, ee nidaamka la mariyey, lana fuliyey iyada oo la adeegsanayo qalabka elektroniga ah oo ay ka mid yihiin saxiixyada habka elektroonigii waxa loo aqbalayaa sidii caddaynta asalka ee loo daliilshan karo lana xirriirta arrin ama macaamilka maaraynta maaliyadda ama xisaab u diiwaangashan, sidii oo ay tahay caddayn sugan oo markhaati la dhaariyey leh.
4. In lagu qoro Diiwaanka Xisaabaadka, buugga lacagta iyo buuggaagta kale ee xisaabaadka ee miisaaniyadda hay'ad kasta ama gacan ha lagu qoro ama kumbiyuutar ahaan ha loo geliyo waxa loo aqbalayaa;-
   b. Sidii caddaynta asalka ah ee loo dalliishan karo lana xirriirta arrin ama macaamilka maaraynta maaliyadda,
   t. Sidii oo ay tahay in uu bixiyey caddayn sugan oo markhaati la dhaariyey leh oo Sarkaalka Idman ama saraakiisha kale ee miisaaniyadda Hay'adda leh,
   j. Sidii in la caddayn karo Diiwaanada gacanta ama kombiyuutarak lagu qoray, buugga lacagta iyo buuggaagta kale ee Xisaabadka in ay yihiin ama ahaayeen buugaagtii xisaabaadka ee asalka ah ee missaniyadda ama xisaabaadaka Hay'addas.

x. Sidii oo kale in qoraalkooda loo geliyey Diiwaanada sidii caadiga ahayd ee waafaqsan hawl maalmeedkooda, iyo in ay buugaagtu yihiin ama si toos ah uga imanaya cidda masuulka ka ah miisaaniyadda iyo xisaabaadka Hay'addaas.

## MADAXA 13-AAD

## MAAMULKA DAKHLIGA KHEYRAADKA DABIICIGA

### Qodobka 62-aad

### Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga

Dakhliga kheyraadka dabiiciga ah waa in ay ku jiraan dhammaan dakhliga Dawladda ee ka soo baxa bixinta shatiyada, Cashuuraha ama ka faa'iideysi kasta oo kale sida Kaluumeysiga, Macdanta iyo dakhliga Shidaalka.

### Qodobka 63-aad

### Ururinta iyo Dhigista Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah

1. Dhammaan dakhliga ka soo xarooda kheyraadka dabiiciga ah ee Dawladda Puntland kaga soo aaday qeybsiga lagu heshiiyey ee hanaanka Federaalka ee Soomaaliya waxa lagu shubayaa Sanduuqa Mideysan ee Xisaabtu uga furan tahay Wasaaradda Maaliyadda Bankiga Dawladda Puntland.
2. Xisaab u gaar ah ayaa loo furayaa oo hoos tagaysa khasnada mideysan oo loogu tala galay in lagu shubo dakhliga khayraadka dabiiciga ah ee ka yimaadda noocyadooda kala duwan ee khayraadka dabiiciga ah.

### Qodobka 64-aad

### Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga

1. Waa in uu jiraa heshiis la isku wada raacay ee khayraadka dalka una dhexeeya Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland.
2. Sidoo kale waa in Dawladda Puntland ay samaysaa qoonadada wareejinta Dawladdaha hoose ee qaybsiga dakhliga laga helo khayraadka dabiiciga ah deegaannada ay ka kooban tahay.
3. Wadaaga dakhliga Kheyraadka dabiiciga waa in uu waafaqsan yahay heshiiska dakhli qeybsiga Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland, ka dib marka la sameeyo Xeer Dhigaalka Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga si waafaqsan Xeerkan.

4. Lacag kasta oo laga isticmaalayo xisaabaad hoosaadyada dakhliga laga helo kheyraadka dabiiciga waa in loo sameeyo nidaam la waafajiyey ku tala galka heshiiska qeybsiga dakhliga kheyraadka dabiiciga oo wareejinta Dawladdaha Hoose ee qaybinta ay yagleeleen Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland ee dhigaalka Xeerkan qabo.
5. Qorshe kasta ee laga isticmaalayo xisaabaad hoosaadyadaa u gaarka ah dakhliga kheyraadka dabiiciga ee sannad Maaliyadeedka sida uu qorayo heshiiska qeybsiga dakhliga ee Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland, oo ay ku jiraan Kharashyada Dawladdu ay gashay iyo xawilaadaha loo diray Dawladda Puntland, waa in ay ku caddahay qoondada Miisaaniyadda ee Golaha Wakiilladu oggolaaday.
6. Iyadoo la raacayo heshiiskii qeybsiga dakhliga kheyraadka dabiiciga ee u dhexeeya Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland, Wasiirka Federaalku waa in uu diyaariyo Heshiisyo Is-afgarad oo uu la gelayo Wasiirka dhiggiisa ah ee Dawladda Puntland kuna cadyihiin shuruudaha wareejinta dakhliga kheyraadka dabiiciga.
7. Heshiisyada Is-afgarad ee ku xusan farqadda 6-aad ee isla qodobkan waa in ay ku caddahay muddada wareejinta, habka wareejinta iyo warbixin kasta ee la xiriirta sida loo qabtay dakhliga iyo isticmaalka wareejinta ee Dawladda Puntland iyo Dawladda Federaalka.

## Qodobka 65-aad

## Warbixinnada Xisaabta Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga

1. Xisaabiyaha guud waa;
   b. In uu keydiyaa buugaagta xisaabta iyo diiwaanada xisaab-hoosaadyada dakhliga khayraadka dabiiciga.
   t. In uu u gudbiyo Wasiirka iyo Hanti Dhawraha Guud warbixinada Maaliyadeed ee rubuclaha iyo sannadlaha.
2. Wasiirkuna waa in uu diyaariyo una gudbiyaa Golaha Wakiillada warbixinta sannadka dhammaan kharashka laga saaray xisaab hoosaadka dakhliga kheyraadka dabiiciga ee sannad Maaliyadeedkaas
3. Wasiirku waa in uu siiyo warbixin faah faahsan oo 3 bilood ah madaxweynaha oo ku saabsan dakhliga soo galay, Kharashka laga bixiyey iyo wixii harsan oo ku dheeli tiran xisaab hoosaadka dakhliga kheyraadka dabiiciga ee ku jira Khasnadda Guud oo ay ka

XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

mid yihiin haraa kasta ee qoondada dhigaalka dakhliga kheyraadka dabiiciga iyo maalgelintooda.

4. Wasiirada maaliyadda Dawladda Puntland iyo Dawladda federaalka waxay si sanadle ah isula wadaagayaan warbixinta khayraadka dabiiciga ah ee dalka.

## Qodobka 66-aad
## Keydinta Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga

1. Wasiirku waa in uu soo saaro qawaaniin maaliyadeed oo waafaqsan Xeer nidaamiyeyaasha Xeerkan hoos yimaadda oo qeexaya qeybsiga dakhliga kheyraadka dabiiciga ee sannad Maaliyadeed kasta lana caddeeyo qoondada dhigaalka ay tahay in la keydiyo.
2. Awaamiirta Maaliyadeed ee kor ku xusan waa in ay ka wada heshiiyaan Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland.
3. Keydinta kor ku xusan waa in maalgelin lagu sameeyo si waafaqsan siyaasadda maalgelinta ee dakhliga kheyraadka dabiiciga ee uu soo saaray Wasiirku marka uu la tashado Dawladda Puntland iyo Dowladdda Federaalka iyo Guddiga la talinta Maalgashiga ee heer Federaal iyo Heer Dawladda Puntland.
4. Siyaasadda maalgashiga shuruudaha looga baahan yahay sida ku xusan farqaddan waxa loo fiirin ayaa in aysan halis gelineyn degenaashaha dhaqaalaha guud ee dalka.
5. Siyaasad kasta ee maalgshiga ee dakhliga kheyraadka dabiiciga, keydinta, faa'idada ay dhasho hantida Maaliyadeed ee Dalka ama dibedda waa in loo sameeyo hab waafaqsan Xeerkan oo ay isku waafaqeen Dowlada Federaalka iyo Dawladda Puntland.
6. Dawaladda Puntland waxay go'aan ka gaari kartaa qorshaha maalgashiga baaxadda leh ee kaabayaasha lagana maalgelin ayo keydka dakhliga kheyraadka dabiiciga ee ay qayb ahaan u helaan laguna qoondeeyaa Miisaaniyadda Dawladda ee uu Golaha Wakiilladu oggolaaday.

## Qodobka 67-aad
## Burin

Waxaa la buriyey xeer, Xeer-hoosaad, Habraac iyo wareegta kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.

## Qodobka 68-aad
## Dhaqangal

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiiladdu ansixiyo, Madaxwaynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.